# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADA

# XEERKA WAXBARASHADA QARANKA

## *(XEER Lr. 77/2018)*

*January 2018*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-190/082018** **Taar: 25/08/2018**

# Wareegto Madaxweyne

## Dhaqan-galka Xeerka Waxbarashada Qaranka
## Xeer Lr. 77/2018

**Markaan Arkay:** Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

**Markaan Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-37/802/2018, summaddiisuna tahay Ref: GW/9/26/166/2018, kuna taariikhaysan 05/08/2018, ujeeddadiisuna tahay soo gudbin go'aanka ansixinta Xeerka Waxbarashada Qaranka, Xeer Lr. 77/2018;

**Markaan Arkay:** Qodobada 75aad iyo 76aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Waxaan soo-saaray;**

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Waxbarashada Qaranka, Xeer Lr. 77/2018.

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

RL:107 RECEIVED 28/08/2018

Ref: GW/KF-37/802/2018 Date: 02/08/2018

**Ujeedo:- Go'aanka ansixinta Xeerka Waxbarashada Qaranka**
**(Xeer Lr. 77/2018)**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay: -** | Qodobka 38aad ,77aad ,78aad ee Dastuurka Qaranka |
| **Markuu arkay: -** | Qodobka 15aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland oo si cad u qeexay mabaadii'da guud ee Waxbarashada Qaranka. |
| **Markuu ku qancay: -** | Baahida loo qabo in la helo waxbarasho tayo leh oo soo saarta arday xil-kas ah, fa'ido leh, aqoon leh, si qummanna ula dhaqmi kara qoyskiisa, jaarkiisa iyo guud ahaanba bulshada. |
| **Markuu yaqiinsaday**: - | In waxbarashadu ay tahay xaq ay wadaleeyihiin dhammaan muwaadiniinta Somaliland isla mar-ahaantaana loo baahan yahay in la wada gaadhsiiyo dhammaan degaannada Somaliland. |
| **Markuu dersay: -** | Baahida loo qabo samaynta sharci nidaamiya arrimaha waxbarashada Somaliland. |
| **Markuu tix-geliyey: -** | Tusmooyinka xeerkan iyo sida uu ugu qotomo Diinta Islaamka, dhaqankeena, ku-dhaqanka Dawladnimo iyo xaaladaha dhaqaale ee uu dalku maraayo. |
| **Markuu aqoonsaday**: - | Ahmiyadda ay waxbarashadu u leedahay horumarinta dhaqaalaha, siyaasadda, caddaaladda, arrimaha bulshada iyo anshaxa qumman ee ku dhisan axkaamta Diinta Islaamka. |

**Markuu u Arkay:-** Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:77/2018** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhaysnaad **22/01/2018**

**Markuu Arkey:-** Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:78/2017** ee Golaha Guurtida JSL kuna Taariikhaysnaa **07/04/2018**

**Markuu Arkay:-** In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku samayeen kuna ansixiyeen todoba iyo afartan **(47)** cod **Xeerka Waxbarashada Qaranka .**

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah afartan iyo shan **(45)** mudane oo gacan taag ah ku ogolaaday Xeerka Waxbarashada Qaranka **(Xeer Lr.77 /2018) .**

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

GOLAHA WAKIILADA JAMHUURIYADA SOMALILAND

**Baashe Maxamed Faarax**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**
**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay: -** | **Qodobka 15aad** ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland oo si cad u qeexay mabaadii'da guud ee Waxbarashada Qaranka. |
| **Markuukuqancay:** - | Baahida loo qabo in la helo waxbarasho tayo leh oo soo saarta arday xil-kas ah, fa'ido leh, aqoon leh, si qummanna ula dhaqmi kara qoyskiisa, jaarkiisa iyo guud ahaanba bulshada. |
| **Markuu yaqiinsaday**: - | In waxbarashadu ay tahay xaq aywadaleeyihiin dhammaan muwaadiniinta Somaliland isla mar-ahaantaana loo baahan yahay in la wada gaadhsiiyo dhammaan degaannada Somaliland. |
| **Markuu dersay: -** | Baahida loo qabo samaynta sharci nidaamiya arrimaha waxbarashada Somaliland. |
| **Markuu tix-geliyey: -** | Tusmooyinka xeerkan iyo sida uu ugu qotomo Diinta Islaamka, dhaqankeena, ku-dhaqanka Dawladnimo iyo xaaladaha dhaqaale ee uu dalku maraayo. |
| **Markuu aqoonsaday**: - | Ahmiyadda ay waxbarashadu u leedahay horumarinta dhaqaalaha, siyaasadda, caddaaladda, arrimaha bulshada iyo anshaxaqumman ee ku dhisan axkaamta Diinta Islaamka. |

# WAXA UU ANSIXIYAY

## XEERKA WAXBARASHADA QARANKA

## Xeer Lr. 77/2018

# QAYBTA KOWAAD
# QODOBBO GUUD
# XUBINTA 1AAD
# QODOBBO HORDHAC AH

## Qodobka 1aad
## Magaca Xeerka

Magaca xeerkan waxa uu noqonayaa Xeerka Waxbarashada Qaranka, Xeer **Lr. 77/2018.**

## Qodobka 2aad
## Erey Bixinta

Ereyada hoos ku qoran haddii aanu Xeerku si kale u qeexin waxaa loola jeedaa: -

| | |
|---|---|
| **Waxbarasho: -** | waxaa loola jeedaa aqoon-u-kordhinta iyo Barbaarinta ardayda. |
| **Arday:** - | waa qof kasta oo wax lagu baro ama lagu tababaro goob waxbarasho da'kasta oo uu yahay. |
| **Waxbarasha Aasaasiga ah ama (Dusiyada Hoose/dhexe)**: - | waa waxbarashada ka bilaabanta fasalka koowaad ilaa fasalka siddeedaad. |
| **Goob Waxbarasho: -** | waa goob kasta oo Dawladdu leedahay ama gaar loo leeyahay oo si joogto ah dad wax loogu baro; ha ahaato fasal keliya ama fasallo badan, waxaa ku jira goobaha wareega ama guurguura, dugsiyada Quraanka iyo goobaha waxbarshada fog. |
| **Goobaha waxbarashada Aasaasiga ah: -** | Waa goobaha Lagu Bixinyo Waxbarashada Aasaasiga ah. |

**Dugsiyada Quraanka**: Waa goobaha u gaarka ah bixinta waxbarashada Quraanka Kkariimka Ah iyo Tarbiyada Islaamiga ah.

**Dugsiyada Xanaanada Caruurta:** Waa goobaha waxbarasho ee bixiya waxbarashada ka horaysa Fasalka 1aad.

**Heer Waxbarasho: -** waa muddo waxbarasho oo sannado xaddidan leh.

**Waxbarashada Tooska ah: -** waa waxbarashadada caadiga ah ee ku dhisan nidaamka heerarka waxbarashada, sida heerka koowaad, labaad iyo sadexaad.

**Waxbarasha Dadban:** waa waxbarashada nidaamsan oo ka baxsan waxbaashada tooska ah.

**Heer-beegga Waxbarashad: -** waxa loola jeedaa qaabka iyo heer-beegga lagu qiyaaso, laguna jaangooyo tayada waxbarashada.

**Tayo-dhawrka Waxbarashada: -** waa qiimaynta iyo ilaalinta tayada waxbarasho.

**Qiimaynta Ardayga: -** waa imtixaan ama qaababka kale ee loo qiimeeyo heerka aqoonta, xirfadda, ku fiicnaanshaha, xariifnimada iyo fahamka qofka oo la xidhiidha maadada la dhiganaayo.

**Qiimaynta Nidaamka Waxbarashad: -** Waa hab lagu ogaado xaaladaha waxbarashada si loo helo xog sugan oo lagu gaadhi karo go'aan hagaagsan.

**Imtixaanka Qaranka:** Waa imtixaanka ugu dambeeya ee ku xusan qodobka 50aad.

**Guddida Imtixaanka Qaranka: -** Waa guddiga lagu dhisay si waafaqsan qodobka 53aad.

**Guddoomiyaha Giddida Imtixaanaadka Qaranka: -** waa Gudoomiyaha Guddiga Imtixaanaadka Qaranka ee ku magacaaban qodobka 53aad, faqradiisa 2aad ee xeerkan.

**Bare: -** waa gudbiye ama barbaariye wax ka dhiga goobaha waxbarasho, oo uu ka mid yahay maamulaha dugsigu.

waa qofka loo igmado in uu si joogto ah ama aan

joogto ahayn u maamulo dugsi.

**Maamule Dugsi: -**

waa shaqaale xirfadeed ka tirsan shaqaalaha goob waxbarasho oo Dawladeed ama gaar ah.

**Shaqaale Goob Waxbarasho: -**

waa shaqaalaha ka diiwaan gashan Wasaaradda Waxbarashada iyo Taclinta Sare (ama Gaar ah).

**Shaqaale Waxbarasho: -**

waa gudoomiyaha guddida dugsiga Waalidinta.

**Gudoomiyaha Guddida: -**

Waa Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee JSL.

**Wasaaradda: -**

waa Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare.

**Wasiir: -**

Waa Agaasimaha Ama Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee ku magacaaban si waafaqsan qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

**Agaasimaha Guud: -**

waa Agaasimaha Guud ee Tacliinta Sare ee ku magacaaban si waafaqsan qodobka 90aad ee dastuurka Somaliland.

**Agaasimaha Guud ee tacliinta Sare: -**

waa sarkaalka ugu sarreeya waxbarashada heer gobol.

**Guddoomiyaha Waxbarashada Gobolka: -**

waa sarkaalka ugu sarreeya waxbarashada heer degmo.

**Guddoomiyaha Waxbarashada Degmada: -**

waa waxbarashada heerka sadexaad, kana bilaabanta wixii ka dambeeya fasalka 12aad ee dugsiga sare.

**Tacliinta Sare: -**

Waa dhammaan waxbashada u dhigan hannaanka qorshaysan ee sida taxanaha ah loogu gudbiyo arday.

**Manhaj Qaran: -**

Waa goob si joogto ah wax loogu barto, ha noqdaan hal fasal ama wax ka badan.

**Dugsi: -**

| | |
|---|---|
| **Dugsiga Dawladda ama Good waxbarasho oo Dawladeed: -** | waa dugsi ama goob waxbarasho oo ay maamusho, daryeeshana Dawladdu. |
| **Dugsiga Gaarka ah ama goob waxbarasho oo gaar ah: -** | waa dugsi ama goob waxbarasho oo si gaar ah lo leeyahayloona Maamulo. |
| **Waalid: -** | waa lammaanaha ardayga dhalay ama midkood, ama qof kasta oo soo koriyey ama sifo kale oo sharci ah uga mas'uul ah. |
| **Afka Hooyo ama Luqadda Qaranka: -** | waa Af-Soomaaliga. |

### Qodobka 3aad
### Xadka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxaa lagaga dhaqmayaa dhammaan xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland iyo dhammaan goobaha waxbarasho ee dalka.

### Qodobka 4aad
### Fasiraadda Xeerka

Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Dastuurka Qaranka iyo Xeerarka kale ee dalka.

## XUBINTA 2AAD

## UJEEDOOYINKA GUUD EE WAXBARASHADA QARANKA

### Qodobka 5aad
### Ujeedooyinka Waxbarashada

Waxbarashadu waa xaq dastuuri ah oo muwaadin kastaa leeyahay, Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay muwaadinka siinaysaa waxbarasho ujeedadeedu tahay in: -

1. La dhiso “bulsho” ama ummad ku salaysan dhaqanka Diinta Islaamka, aqoon’ahaan, anshax’ahaan iyo akhlaaq’ahaan.
2. La cidhib-tiro wax-akhris-qoris la’aanta, lanna kobciyo barashada diinta iyo ku-dhaqankeeda iyo ku xeel-dheerida cilmiga Sayniska, Tiknolojiyadda, aqoonta maamulka, xirfadaha aqooneed ee kala duwan.
3. Ardayda inta ay da’ yarta yihiin lagu ababiyo dareen wadaninimo si ay u yeeshaan qiiro waddaniyadeed, isdhexgal waara, deganaansho iyo hodantinimo.
4. La helo aqoon, xirfad iyo aqoon lagu ilaalinayo deegaanka si ubadka dambe looga tago dhaxal waara;
5. La helo xirfado iyo aqoon dhiirrigelisa koboc dhaqaale, caddaalad, xil-kasnimo iyo qiimeynta aayaha nabadda;
6. Ubadka lagu tallaalo jacaylka iyo dhowridda sharafta shaqada.
7. Fiiro gaar ah loo yeesho horumarinta, fidinta iyo gudbinta aqoonta iyo waxbarashada.
8. La soo saaro qof ah Muslin wanaagsan, kana dhisan dhinacyada maskaxda, ruuxda, fikirka, jidhka iyo aqoonta diinta kaa soo si laxaad leh uga qayb qaadan kara horumarkaqowska, bulshada iyo qaranka.
9. Kor loo qaado barashada Diinta Islaamka ee heer kasta iyo horumarinta “Malcaamadaha” Qur’aanka ee dalka oo sal u noqonaysa waxbarashada dugsiyada.
10. Mudnaanta la siiyo waxbarashada aasaasiga ah iyada oo lagu fidinaayo gobollada, degmooyinka iyo tuulooyinka dalka oo dhan.
11. Kor loo qaado waxbarashada dadka waaweyn, lana dhiirri-geliyo Jidh-dhiska iyo ciyaaraha.
12. La helo bulsho ka dhisan aqoonta Diinta Islaamka, akhlaaqda toosan iyo xirfadaha anshaxa waafaqsan.
13. Ardayda lagu beero hawlkarnimo, korna loo qaado ilaalinta nabadda, lana kobciyo xidhiidhka ka dhexeeya qofka iyo qoyska, bulshada, qaranka iyo caalamka.
14. Kor loo qaado daacadnimada, isku-tashiga, isu-dulqaadashada, iskaashiga, is-xil-qaanka, laab-xaadhnaanta, run sheeg, is-dhaliilka fekerka ku dhisan, cadaaladda, xaq-soorida iyo nabadda.
15. Lagu barbaariyo walaaltinimada Islaamka, isqadarinta iyo iskaalmaysiga fiican
16. La dhiirrigeliyo cadaaladda bulshada oo ku salaysan Diinta Islaamka.

## XUBINTA 3AAD

## MABAADII'DA GUUD

### Qodobka 6aad
### Mabaadii'da Guud ee Xeerka

Xeerka Waxbarashada Qaranku waxa uu ku dhisan yahay mabaadii'da hoos ku qoran: -

1. Shareecadda Islaamka oo ah sharciga dalka ugu sarreeya, waxaana reebban wixii xeer ah ee ka soo horjeeda sida uu dhigaayo Qodobka 5aad, faqradiisa 2aad ee Dastuurka Somaliland.
2. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay waxbarasho.
3. Horumarinta, baahinta iyo fidinta waxbarashada iyadoo la gaadhsiinaayo Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka.
4. Taabbo-gelinta Waxbarasho tayo leh oo suurto-gelisa horumar dhinac walba ah.
5. Bixinta Waxbarasho aasaasi ah oo khasab iyo lacag la'aan ah, marka ay duruuftu saamaxdana waa in ay Dawladdu gaadhsiisaa dugsiyada sare.
6. Dhiirrigelinta waxbarasho ku dhisan baahiyaha iyo waayaha deegaanka gaar ahaaneed ee bulshada Somaliland iyo hirgelinta Manhaj midaysan.
7. Barashada iyo tarbiyadda diinta Islaamka dhammaan heerarka waxbarshada dalka.
8. Dhiirrigelinta iyo kor u qaadidda Waxbarashada Haweenka.
9. Dhiirrigelinta xuquuqda aadamaha, Saraynta Sharciga, caddaaladda, iyo hannaan ku dhisan la-xisaabtan iyo daah-furnaan (hufnaan) oo ka jawaabaya danaha dadweynaha.
10. Horumarinta daacadnimada, xisaabtanka iyo habsami u maamulka arrimaha waxbarashada iyo hantida qaranka.
11. Xaqa furashada dugsiyo waxbarasho oo gaar ah si waafaqsan xeerkan.
12. Baahinta iyo hoos u-daadejinta maamulka Waxbarashada.
13. Dhiirrigelinta ka qaybgalka waxbarashada iyo kor u-qaadidda iskaashiga dhammaan daneeyeyaasha ku hawllan waxbarashada.
14. Kobcinta waxbarashada sare, Dugsiyada farsamada, tiknooloojiyadda iyo goobaha cilmi-baadhista.
15. Ilme (Ubad) kastaa waxa uu xaq ugu leeyahay waalidkiisa waxbarasho iyo barbarian.

## QAYBTA LABAAD

## NIDAAMKA WAXBARASHO

### Qodobka 7aad

## Qaybaha Waxbarashada

1. Qaybaha waxbarashada dalka Somaliland waxa ay yihiin: -
    a) Waxbrashada tooska ah iyo
    b) Waxbarashada Dadban.
2. Goobaha waxbarashadu waxa ay fulin karaan labada qaybood ee kor ku xusan ama midkood.
3. Ardayga dhigtay waxbarashada dadban waa u wareegi karaa waxbarashada tooska ah si waafaqsan xeerka.

# XUBINTA 1AAD
# WAXBARASHADA TOOSKA AH

## Qodobka 8aad
## Waxbarashada Tooska ah

Waxabarashada tooska ah oo ah waxbarasho ku dhisan nidaamka heerarka waxbarashada sida heerka koowaad, labaad iyo sadexaad waa in ay qeexdaa ujeeddada, dariiqada, manhajka, muddada, iyo qaabka qiimaynta iyo imtixaannada.

## Qodobka 9aad
## Heerarka Waxbarashada Tooska ah

Waxbarashada tooska ahi waxa ay u kala baxdaa sida hoos ku cad: -

1. Dugsiyada Qur'aanka iyo xanaanadda carruurta.
2. Heerka Koowaad; (Waxbarashada Hoose/Dhexe).
3. Heerka Labaad; (Waxbarashada Dugsiga Sare).
4. Heerka Saddexaad: Tacliinta Sare oo lagu nidaaminayo xeer u gaar ah.

# FARACA 1AAD

# DUGSIYADA QUR'AANKA IYO WAXBARASHADA XANAANADDA CARRUURTA

## Qodobka 10aad
## Maamulka Dugsiyada Qur'aanka iyo Xanaanadda carruurta

1. Wasaaradda Waxbarashadu waa in ay dhiirri-gelisaa faafinta dugsiyada Qur'aanka iyo xanaanadda carruurta iyada oo la kaashanaysa Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta.
2. Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah waxaa maamulaaya Wasaaradda Waxbarashada, Wasaaradda Diinta iyo Awqaaftuna waxa ay ku leedahay kormeer.
3. Dugsiyada Xanaanadda carruurta waxaa si gaar ah u maamulaaya Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare, Wasaaradda Diinta iyo Awqaaftuna waxa ay ku leedahay kormeer.
4. Wasaaradda Waxbarashadu waxa ay yeelanaysaa xafiis u xil-saaran dugsiyada xanaanadda Carruurta.

## Qodobka 11aad
## Ujeeddooyinka Waxbarashada Xanaanadda carruurta

Ujeeddooynka Waxbarashada xanaanadda carruurta
Waa in: -

1. La baro Qur'aanka Kariimka ah, laguna barbaariyo jacaylka Diinta Islaamka iyo ku-dhaqankeeda.
2. Lagu barbaariyo anshaxa iyo asluubta wanaagsan.
3. Lagu Xanaaneeyo carruurta jacaylka diintooda, dalkooda, dadkooda, dariskooda, waalidkooda iyo barehooda.
4. Lagu barbaariyo la-dhaqanka faciisaiyo dadka kale.
5. Lagu barbaariyo dhismaha jidhka, dabeecad wanaaga, maskaxda iyo waxtarka ay nadaafaddu leedahay.

## Qodobka 12aad
## Furashada Dugsiyada Xanaanadda carruurta

1. Ma bannaana in la furto ama la maamulo ama laga shaqeeyo dugsiyada xanaanadda carruurta haddii aan loo diiwaangelin si waafaqsan xeerkan.
2. Dugsi kasta oo ah Xanaano carruureed waa in uu ahaadaa goob nadiif ah oo Xasiiloon kuna habboon waxbarasho.

## Qodobka 13aad
## Manhajka Dugsiyada Xanaanadda carruurta

1. Dugsiyada Xanaanadda carruurta waa in ay dhigaan manhajka ay Wasaaraddu Waxbarshadu u dejiso.

2. Manhajka Qaranka ee xanaanadda carruurta ee ku xusan faqradda koowaad waa in uu qeexaa aqoonta, xirfadda, iyo aqoonta diinta Islaamka ee la rabo inuu ardaygu helo.
3. Dugsi kasta oo ah xanaanin carruureed oo raba in uu fuliyo manhaj aan ahayn ka qaranka waa in uu ogolaansho ka helaa Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare si waafaqsan xeerka.
4. Waxaa khasab ah in lagu dhigo dugsiyada xanaanadda carruurta oo dhan maaddooyinka Diinta Islaamka, Af Somaaliga iyo Af Carabiga, Wasaaraddana waxa uu xil ka saaran yahay daryeelka Dugsiyada Qur'aanka iyo horumarintooda.
5. Caruurta aan u Dhalan wadanka Xanaanadooda waxa wax loogu dhigi karra afafkooda iyadoo ogolaansho looga helayo wasaarada waxbarashada.

## FARACA 2AAD

## WAXBARASHADA HEERKA KOOWAAD (Dugsiyada Hoose/Dhexe)

### Qodobka 14aad
### Waxbarashada Aasaasiga ah (Dugsiyada Hoose/Dhexe)

1. Waxbarashada aasaasiga ahi waa heerka koowaad ee waxbarashada hoose/dhexe, waxa aanay sal u tahay waxbarashada Dalka, Dawladuna si waafaqsan xeerkan waxa ay u abuuraysaa dugsiyada hoose/Dhexe ee Qaranka.
2. Arday kasta oo soo galaya fasalka koowaaad waa inay u bilaaban tahay akhriska Qur'aanka ilaa Jus Camma.

### Qodobka 15aad
### Ujeeddooyinka Waxbarashada Asaasiga ah (Dugsiyada Hoose/Dhexe)

Ujeedooyinka laga leeyahay Waxbarashada aasaasiga ahi waa in ay: -

1. Dhiirri-gelisaa barashada iyo ku-dhaqanka Diinta Islaamka, Caqiidada toosan, anshaxa wanaagsan iyo waddaniyadda.
2. Ardayda ka caawisaa dhismaha maskaxda, jidhka iyo shakhsiyadda, siisaana awood aqooneed iyo mid xirfadeed.
3. Ardayda siisaa waxbarasho ku salaysan manhajka, kuna habboon da'dooda iyo heerkooda.
4. Kor u qaaddaa Xirfadaha dhegeysiga, ku-hadalka, akhriska iyo qorista far Soomaaliga, Carabida, Ingiriisiga iyo barashada aqoonta casriga ah.
5. U gudbiyaan ardayda Gundhig wanaagsan oo barashada tirooyinka ah iyo sida xisaabaha loogu adeegsado xallinta dhibaatooyinka/mas'aladaha nolosha.

6. Carruurta baraan is-ixtiraamka iyo wax-wadaqabsiga, si ay u anfacaan qayskooda, bulshadooda iyo qarankooda.
7. Ardayga ku tababartaa adeegsiga maskaxda, fikirka toosan iyo wax curinta.

## Qodobka 16aad
## Da'da Isqorista Waxbarashada Aasaasiga ah (Dugsiyada Hoose/Dhexe)

1. Muddada Waxbarashada Dugiyada Hoose/Dhexe waa 8 sano, Waxaana la qori karra ilmo 6 sano jir ah kana weynayn 14 sano.
2. Ardayna looguma diidi karo waxbarashada aasaasiga ah in uu ka weyn yahay da'dii loogu talo-galay, haddii ay jiraan sababo maangal ahi.
3. Ardayda ka weyn 14 sano waxbarashana u baahan waxa u gelayaa waxbarasho Dadban.

## Qodobka 17aad
## Manhajka Dusiyada Hoose/Dhexe

Waxaa ku waajib ah dhammaan dugsiyada hoose/dhexe in ay isticmaalaan manhajka ay dejisay/so Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sayniska haddii aan si gaar ah looga dhaafin.

## Qodobka 18aad
## Afka Waxbarashada Aasaasiga ah (Dugsiyada Hoose/Dhexe)

1. Dugsiyada Hoose waxaa lagu dhiganayaa Af-Soomaaliga haddii aanay Wasaaraddu si gaar ah uga dhaafin.

2. Dugsiyada Dhexe waxaa lagu dhiganayaa Af-Engiriisi haddii aanay Wasaaraddu si gaar ah uga dhaafin.

3. Haddii afka wax lagu bartaa uu yahay mid aan ahayn Af-Soomaaliga, waxaa waajib ah in Af-Somaliga maaddo ahaan loo dhigo.

## Qodobka 19aad
## Maamulka Waxbarashada Aasaasiga ah (Dugsiyada Hoose/Dhexe)

Wasaaradda Waxbarashadu waxa ay yeelanaysaa xafiis u xil-saaran waxbarashada aasaasig ah (dugsiyada Hoose/Dhexe), Malcaamadaha iyo Xanaanada.

# FARACA 3AAD

# WAXBARASHADA DUGSIYADA SARE (Heerka Labaad)

## Qodobka 20aad
## Waxbarashada Dugsiga Sare (Heerka Labaad)

Waxbarshada Dugsiyada sare waa heerka labaad ee waxbarashada, Dawladuna si waafaqsan xeerkan, waxa ay abuuraysaa dugsiyada sare ee qaranka.

## Qodobka 21aad
## Ujeeddooyinka Waxbarashada Dugsiga Sare

Ujeeddooyinka Waxbarashada dugsiyada sare waa in ay: -

1. Soo saarto qof leh anshax wanaagsan, waddaniyad iyo aqoon tayo leh.
2. Tabantaabiso horumarinta ardayga dhan walba, xag caqiido, xag maskaxeed iyo xag jidh ahaaneedba.
3. Siiso ardayga aqoon iyo xirfad u suurto-gelisa in uu kor u qaado heerka nolashiisa iyo tan bulshadiisa.
4. U gudbiso ardayga aqoonta casriga ah.
5. U diyaariso inuu sii wadan karo waxbarashada tacliinta sare.

## Qodobka 22aad
## Noocyada Waxbarashada Dugsiga Sare

Noocyada Heerka labaad waxa ay u qaybsami karaan

1. Dugsiyada Sare ee caamka ah oo muddada wax lagu bartaa ay tahay afar sano.
2. Dugsiyada Sare ee farsamada oo muddada wax lagu bartaa ay noqon karto saddex ama afar sano, iyo
3. Dugsiyada Xirfadalayaasha oo ah ilaa 2 sano (Vacational Schools).

## Qodobka 23aad
## Qorrista Dugsiyada Sare

Dugsiyada Sare waxaa loo ogolaan karaa in ay galaan ardayda soo dhammaystay fasallada 8aad ee dugsiyada dhexe ama dhiggooda ee waxbarashada dadban.

## Qodobka 24aad
## Manhajka Dusiyada Sare

Dugsi kastaa waa in uu isticmaalaa manhajka ay dejisay/so Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare haddii aan si gaar ah looga dhaafin.

## Qodobka 25aad
## Afka Waxbarashada Dugsiyada Sare

**1.** Afka Waxbarashada Dugsiyada Sare waa Afka-Ingiriisiga ama Af-Carabiga haddii aanay Wasaaraddu oggolaan afaf kale (language of instruction).
2. Waa in Afka Soomaaligu Luuqada ahaan la Socdaa Heerarka waxbarashada oo Dhan.

## Qodobka 26aad
## Maamulka Dugsiyada Sare

Wasaaradda Waxbarashadu waxa ay yeelanaysaa xafiis u xil-saaran dugsiyada Sare.

# FARACA 4AAD

# TACLIINTA SARE

## Qodobka 27aad
## Tacliinta Sare (Heerka Saddexaad)

1. Waxa ay dowladdu u ansixinaysaa Goobaha Tacliinta sare ee qaranka si waafaqsan xeerka tacliinta sare.
2. Tacliinta Sare waxabixinaayaJaamacadaha, Macaahidda Tacliinta Sare, Kulliyadaha, iyo goobaha kale ee ku magacaaban magacyo kale si waafaqsan Xeerka Tacliinta Sare iyo xeerarka waxbarashada
3. Goobaha Waxbarashada Sare ee dowladdu waxa ay leeyihiin jirid qaanuuni ah oo madax-baannaan, waxaanay dowladdu ku leedahay daryeel, kormeer iyo qiimayn si waafaqsan xeerka waxbarashada sare.
4. Goobaha waxbarshada sare ee gaarka loo leeyahay waxa ay leeyihiin madax-bannaani, waxa aanay dowladdu ku leedahay kormeer iyo qiimayn si waafaqsan xeerka tacliinta sare.
5. Furitaanka goobaha waxbarashada sare, qiimayntooda, kormeerkooda iyo maamulkooda waxaa qeexi doona xeerka tacliinta sare.

## Qodobka 28aad
## Guddiga Tacliinta Sare (heerka saddexaad)

1. Xeerkan waxa lagu dhisayaa Guddiga Tacliinta Sare oo ka mas'uul ah ilaalinta tayada waxbarashada sare si waafaqsan nidaamka waxbarashada Qaranka.

2. Qaab dhismeeka guddiga, xilka iyo waajibaadka iyo faahfaahinta qodobkan waxa lagu qeexayaa Xeerka Tacliinta Sare.

## Qodobka 29aad
## Qaab-dhismeedka Tacliinta Sare

1. Dawlada Waxay Abuuraysa taclinta sare si loo helo aqoon sare oo samaysa cilmi baadhis casriya oo ku Saabsan Dhinac kasta Sida wax Soo saarka Arimaha Bulshada, Dhaqaalaha, technologyada, caafimadka, ganacsiga IWM.
2. Taclinta sare waxay ka Duulaysa in hadba la dhiri geliyo baahida waxbarashada ee Qaranka sidii dalka looga heli laha Muwaadiniin Shaqo iyo Noolol Wanaagsan.
3. Taclinta Sare waxa Saldhig u ah aqoon Casri oo tayo leh kana qayb qaadata horumarka iyo Kobcinta Dhaqaalaha dalka.
4. Goobaha taclinta Sare waxay ilaalinayaan Tayadooda iyo Habsami u Socodsiinta Shaqadooda (kormeeridda) Guddiga Hubinta tayada tacliinta Sare (Quality Assurance Committee for Higher Education).
5. Barnaamijka guud iyo qaabka Shaqo ee Taclinta Sare Waxa nidaaminaya Xeerka Taclinta Sare.

## Qodobka 30aad
## Heerarka Tacliinta Sare

1. Taclinta Sare Waxay yeelanaysa afar heer oo Waxbarasho ah: -

    a. Waxbarasha Macaahida taclinta sare (Colledge) ama Macaahida Farsamada (Polytechnics) waxayna Bixinaysa Shahaadooyin (Certificate) ama Diploma ka dib marka Mudo 1-2 sano oo waxbarasho ah.
    b. Waxbarashada Degree-ga Koowaad B.A ama BSC (Under graduate Studies), waxayna bixinaysa Shahaado Degree Koowad oo ah Mudo 3-4 sano oo waxbarasho ah Diploma oo ah 1-2 sano oo waxbarasho ah.
    c. Waxbarasha Degree-ga labaad M. A ama M. Sc (post graduate Studies) waxay bixinayaan Shahaadooyin M. A ama M. Sc ka dib 1-2 Sano.
    d. Waxbarashada Degree-ga Sadeexaad PHD (post graduate Studies) waxay bixinayaan Shahaadooyin ka PHD ka dib 3-5 Sano.
2. Furitaanka goob kasta oo waxbarasho iyo heerkeeda Taclimeed waxa Lagu Nidaaminaya Xeerka Taclinta Sare (Higher Education Act).

## Qodobka 31aad
## Qaybaha Waxbarashada Xarumaha Tacliinta Sare

Xarumaha Lagu bixinayo Taclinta Sare waxay kala Noqonayaan Sidan: -

a. Xarunta taclinta Saree ee ay Dawladu leedahay (public University).
b. Xarunta taclinta Saree ee ay Gaar ka loo leeyahay (private University).

c. Xarunta taclinta Saree ee laga soo dhambalay Jamacado ay wadama kale leeyihiin (Foreign University Branch Campuses).

## Qodobka 32aad:
## Hubinta Manhajka Waxbarasho ee Xarumaha Tacliinta Sare ama Jamacadaha

1. Waxa ay wasaaradu waxbarashadu masuul ka tahay hubinta iyo toosinta iyo wax ka bedalka manhajka jaamacadaha iyadoo la kaashanaysa komishanka tacliinta sare ee qaranka.
2. Komishanku wuxu aqoonsi caalami aha u raadinaya jaamacadaha dalka si ay ugu xidhmaan ulana shaqayn karan jaamacadaha kale ee aduunka.
3. Aqoonsi siinta waxa loola jeeda in jaamacadaha Somaliland ay is dhaafsi macalimin, arday iyo midaynta manhajyada ay la yeeshan jaamacado kale oo caalamka ah.

# XUBINTA 2AAD

# WAXBARASHADA DADBAN

## Qodobka 33aad
## Waxbarashada Dadban

1. Waxbarashada dadban oo ah waxbarasho nidaamsan oo loogu talagalay dadka waaweyn ama carruurta ay u suurto-geli weydo waxbarasho toos ahi, waa in ay ahaato mid debecsan dhinaca qeexidda ujeeddooyinka, qaabka, maamulka, muddada, qiimaynta iyo shuruudaha lagu dhamaynayo, waana in ay ahaato mid ku habboon ardayga, una adeegta baahidiisa.
2. Wasaaraddu waa in ay abuurtaa, daryeeshaa Dugsiyada Waxbarashada dadban ee qaranka.
3. Wasaaraddu waa in ay dejisaa hab ardayga u oggolaanayaa in uu ku gaadho heer waxbarasho oo jaamacadeed.

## Qodobka 34aad
## Ujeeddooyinka Waxbarashada Dadban

Waxbarashada dadban waa in ay:

1. U suurto-gelisaa qofka kor u-qaadidda awooddiisa aqooneed iyo farsamo
2. Ardayga siisaa waxbarasho aasaasi ah iyo xirfad uu ku shaqaysan karo
3. Kor u qaaddaa akhriska iyo qorista
4. Siisa qofka awood uu ku sii wadan karo waxbarashadiisa
5. Tahay mid ku habboon dadka la siinaayo, waana in loo eegaa hadba sida loogu baahan yahay xagga horumarinta bulshada iyo dhaqaalaha.

## Qodobka 35aad
## Noocyada Waxbarashada Dadban

Noocyada waxbarashada dadbani waxa ay ka koobnaan karaan, guud ahaan qaybahan: -

1. Akhris Qorista;
2. Waxbarasho guud oo ka saraysa akhris qorista, lehna heerar kala duwan.
3. Xirfad barasho.
4. Mudada waxbarshadada dadbani ee xirfaduhu waxa uu noqonayaa hal sano iyo wixii ka yar.
5. Manhajka waxbarshada dadbani waa inuu noqdaa mid ka turjumaaya baahiyaha aqooneed iyo xirfadeed, kuna salaysnaadaa hab-nololeedka dadka.

## Qodobka 36aad
## Afafka Waxbarashada Dadban

1. Afafka aasaasiga u ah Waxbarashada Dadban waa Afka Soomaaliga, Afka Carabiga, Af-Ingiriisiga ama afafkii kale ee loo baahdo.
2. Iyadoo aan wax loo dhimayn faqradda 1aad waxa la isticmaali karaa luqad aan ahayn ta qaranka, hadii ay sidaasi jirto waa in luqadda Soomaaligu ahataa maaddo si khasab ah loo dhigo.
3. Qorista xarumaha waxbarashada dadban waxa loo ogolaanayaa qof kasta oo waxbarasho u baahan.

## Qodobka 37aad
## Maamulka Waxbarashada Dadban

Wasaaraddu waxa ay yeelanaysaa xafiis u xil-saaran waxbarashada dadban

## Qodobka 38aad
## Waxbarashada Farsamada iyo Xirfadaha

1. Waxa ay Dawladdu u abuuraysaa Dugsiyada Farsamada iyo Xirfadaha si waafaqsan xeerkan.
2. Si waafaqsan faqradda koowaad, Waxbarashada Farsamada waxaa ka mid ah:
    a. Barashada Xirfadaha casriga ah;
    b. Tababarrada gaarka ah ee la xidhiidha shaqo gaar ah;
    c. Tababarrada la xidhiidha kor u-qaadidda xirfadaha jira; iyo
    d. Dugsiyada Farsamada iyo xirfadaha kale ee ay oggolaato Wasaaraddu.
3. Waxbarashada Farsamada iyo Xirfadaha waxaa bixinaaya dugsiyada Dawladda, dugsiyo gaar loo leeyahay iyo kuwa hoosyimaadda hay'ado gaar ah

4. Afka waxbarashada dugsiyada farsamada iyo xirfaduhu waa Af-Soomaali, Af-Carabi, Af-Ingiriisi ama afkii kale ee loo baahdo.
5. Waxbarashada Farsamada Gacanta waxa lagu qeexi doonaa xeer

# XUBINTA 3AAD

# WAXBARASHADA DADKA BAAHIYAHA GAARKA AH QABA

## Qodobka 39aad
## Waxbarashada Dadka Baahiyaha Gaarka ah Qaba

1. Wasaaradddu waa in ay waxbarasho siisaa dadka iinta ku leh jidhka ama maskaxda, sida indhoolayaasha, dhagoolayaasha iyo naafada
2. Wasaaraddu waa in ay samaysaa dugsigyada baahiyaha gaarka ah oo lagu bixiyo waxbarasho ilaa heer dugsi sare.
3. Si waafaqsan qodobkan waa in ay wasaaraddu sharci ku qeexdaa arrimaha soo socda:
    a. Muddada waxbarashada heerka koowaad iyo heerka labaad ee ku habboon ardayga qaba baahiyaha gaarka ah;
    b. Manhajka lagu dhigaayo dugsiyada baahiyaha gaarka ah;
    c. Noocyada ardeyda u baahan waxabarshada baahiyaha gaarka ah iyo qaabka wax loogu dhigaayo;
    d. Iyo wixii kale ee ay Wasaaraddu u aragto in uu muhiim u yahay fulinta xubintan.
4. Muddada waxbarashada ee ay dejiso Wasaaraddu sida ku xusan faqradda 3aad waa in aanay ka yaraan muddada loo xaddiday dugsiyada heerka koowaad iyo heerka labaad ee ku cad xeerkan.
5. Manhajka loo dejiyey dugsiyada baahiyaha gaarka ahi waa inuu la socdaa manhajka qaranka.

## Qodobka 40aad
## Fulinta Waxbarashada Dadka Baahiyaha Gaarka ah Qaba

Barnaamijyada lagu horumarinaayo waxbarashada dadka baahiyaha gaarka ah qaba waxaa si wadajir ah uga wada qayb-qaadan karra Wasaaradda, hay’adaha kale ee qaranka ee ku shaqo leh daryeelka bulshada iyo Dawladaha hoose.

## Qodobka 41aad
## Shuruudaha Goobaha Waxbarashada Dadka Baahiyaha Gaarka ah Qaba

Goob kasta oo lagu fulinaayo waxbarashada dadka baahiyaha gaarka ah qaba waa in ay leedahay Macallimiin u tababaran waxbarashadaas, manhaj xaddidan iyo shaqaale caafimaad.

## Qodobka 42aad
## Maamulka Waxbarashada Dadka Baahiyaha Gaarka ah Qaba

Wasaaraddu waxa ay yeelanaysaa xafiis u xilsaaran waxbarashada baahiyaha gaarka ah.

# XUBINTA 4AAD

# GOOBAHA WAXBARASHO EE KALE

## Qodobka 43aad
## Goobo Waxbarasho oo kale

1. Si waafaqsan xeerkan, Wasaaraddu waxay u samayn kartaa, goobaha waxbarasho ee hoos ku qoran:
    a. Machadyo, aan ahayn kuwa gaadhsiisan heer jaamacadeed oo aan ku xusnayn Xeerka Tacliinta Sare.
    b. Dugsiyo gaar ah;
    c. Dugsiyo farsamada badan leh (Polytechnics); iyo
    d. Goobaha waxbarasho ee kale ee aan ku xusnayn xeerkan iyo xeerka tacliinta sare.
2. Wasaaradaha, Xafiisyada, Waaxaha iyo Hay'adaha Dawladda waxa loo fasaxayaa inay bixiyaan waxbarasho gaar ah oo la xidhiidha takhasuskooda, si waafaqsan xeerkan iyo xeerka tacliitna sare, lanna ilaalinaayo siyaasadaha iyo halbeegyada tayada ee u dejisan waxbarashada.

# QAYBTA SADDEXAAD

# MANHAJKA QARANKA

## Qodobka 44aad
## Manhajka Qaranka

1. Wasaaraddu waa in ay dejisaa manhaj qaran oo loo yaqaanno Manhajka Qaranka si waafaqsan qodobka (45),laguna dhigi doono dugsiyada dalka.
2. Goob kasta oo bixisa waxbarasho gaar ahi waa in ay leedahay manhaj ay oggolaatay Wasaaradda waxbarashadu
3. Dugsiyada gaarka ah, waxa laga soo qaadayaa in ay fuliyaan faqradda 1aad, hadddii ay ku daraan manhajkooda maaddooyinka ku xusan faqradda (2aad) ee qodobkan
4. Manhajka qaranka waa in aanay ku jirin wax ka hor imanaaya shareecada Islaamka iyo anshaxa suubban.

## Qodobka 45aad
## Qorshaha Manhajka Qaranka

Heer kasta oo waxbarasho waa in uu lahaadaa

1. Qorshe manhaj ka turjumaaya ujeeddooyinka guud ee Waxbarashada Jamhuuriyadda Somaliland ee ku xusan qodobka 5aad ee xeerkan iyo mabaadi'da guud ee ku xusan qodobka 6aad ee xeerkan
2. Manhaj maadooyinka waxbarashada u muujinaaya maaddo maaddo iyo fasal fasal
3. Hababka wax-dhigista
4. Qalabka waxbarashada (cashar-kaabayaasha)
5. Muddada waxbarashada iyo jedwelka toddobaadka
6. Qaabka qiimaynta fulitaanka manhajka

## Qodobka 46aad
## Maamulka Manaahijta Qaranka

Wasaaraddu waxa ay yeelanaysaa xafiis u xil-saaran maamulka manaahijta Qaranka.

## Qodobka 47aad
## Maaddooyinka Waxbarashada

1. Maaddooyinka lagu baranaayo dugsiyada Dawladda heerarkooda kala duwan waxa ay ku soo baxayaan xeer-nidaamiyo uu soo saaro Wasiirku.
2. Waxaa khasab ah in lagu dhigo dhammaan dugsiyada dalka maaddooyinka Diinta Islaamka, Af-Somaliga, Af-Carabiga, Ingiriisiga iyo maaddooyinka kale ee ku tilmaaman xeer-nidaamiyaha Wasiirka.

3. Maaddo kastaa waa inay yeelataa kitaab saldhig u ah manhajka fasal kasta.

# QAYBTA AFARAAD

# QIIMAYNTA IYO IMTIXAANAADKA QARANKA

## XUBINTA1AAD

## QIIMAYNTA IYO IMTIXAANAADKA

### Qodobka 48aad
### Qiimaynta Ardayda

1. Wasaaraddu waxa ay awood u leedahay in ay dejiso dariiqada iyo habka Qiimaynta Dugsiyada Hoose/Dexe iyo sare iyo halbeegga la rabo in ay gaadhaan.

2. Qiimaynta ku xusan faqrada (1aad) ee qodobkan waxaa lagu dari karaa imtixaanaadka kale ee loo baahdo.

### Qodobka 49aad
### Mas'uuliyadda Qiimaynta Ardayda

1. Dawladda ayaa ka mas'uul ah qiimaynta waxbarashada dalka heerarkeeda koowaad iyo labaad, mid Dawladeed iyo mid gaar ahba
2. Waa in arday kasta waxbarashadiisa la qiimeeyaa, la diiwaan geliyaa, la kaydiyaa, lanna ogeysiiyaa natiijada imtixaanka.

### Qodobka 50aad
### Imtixaanka Shahaadadda

1. Arday kasta oo dhamaysta heer waxbarasho mid Dawladeed ama mid gaar ahaaneedba waa in uu u fadhiistaa imtixaanka shahaadadda ee Qaranka.

2. Waxaa ku waajib ah dugsi kasta in uu ardaydiisa u diyaariyo imtixaanaadka Xeerkan ama xeer-nidaamiye kale lagu xusay, haddii aanu xeerkani si gaar ah uga soo reebin.

### Qodobka 51aad
### Xeer-Hoosaadyada Imtixaanaadka

Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa Xeer-Hoosaadyada la xidhiidha:

1. In imtixaanaadka loo qaado si xeerka waafaqsan

2. Xilliga iyo goobaha lagu qaadayo Imtixaannada shahaadiga ah iyo shuruudaha imtixaanka looga baahan yahay
3. Lacagta fadhiisinka imtixaanka
4. Habka Imtixaanaadka
5. Manhajka iyo afka imtixaanka
6. Tallaabooyinka xagga ammaanka ee loo baahan yahay in la qaado si loo helo imtixaan hufan oo lagu kalsoonyahay
7. Awoodaha, xilka iyo waajibaadka Madaxa imtixaanaadka.

## Qodobka 52aad
## Qaadista Imtixaanaadka heer Qaran

1. Sida ku xusan faqrada 4aad, qof ama goob waxbarasho midna ma qaadi karo, mana oggolaan karo ama sinnaba uma sababi karto in la qaado imtixaanka heer qaran ee ardayda goobaha waxbarashada Dawladda ama kuwa gaarka loo leeyahay, haddii aanu jirin ogolaanshiiyo hore oo qoraal ah oo ka soo baxay Guddiga Imtixaanaadka Qaranka.
2. Haddii ay Gudiga imtixaanaadku bixiyaan ogolaanshiiyaha ku xusan faqrada (1) aad ee qodobkan, waxa uu madaxa imtixaanaadku ku soo rogi karaa shuruudaha iyo waajibaadka uu u arko in ay lagama maarmaan u yihiin imtixaanka.
3. Iyada oo la tixraacayo qodobkan, qaadista ama maamulidda imtixaanka Dawladda waxaa ka mid ah:
    a. Ugu yeedhidda ardayda in ay galaan imtixaanka
    b. Qoondaynta lacagta fadhiisinka ama lacag bixin loogu talagay imtixaanka
    c. Sixidda ama dhibco-siinta su'aalaha ama ka jawaabidda su'aalaha ama qiimaynta imtixanaadka
    d. Soo saaris ama guddoon-siin shahaado ama dhukumenti kale ama siin marag-kac ku saabsan imtixaanka iyo ficil kasta oo la xidhiidha qabashada imtixaanka iyadoo aan la eegayn in ay arrintani dhacday imtixaanka ka hor ama ka dib.
4. Faqrada (1) aad ee Qodobkan waxaa laga soo reebay oo aan lagu dabbaqayn:
    a. Xafiiska u qaabilsan qaadista imtixaanaadka ee loo aasaasay si waafaqsan Qodobka (61) aad ee Xeerkan.
    b. Guddida Imtixaanadka Qaranka ee loo aasaasay si waafaqsan qodobka 53aad ee Xeerkan.
    c. Goobta waxbarasho ee maamulata imtixaannadeeda iyo qiimaynta ardaydeeda si ay ula socoto heerkooda waxbarasho.
5. Cidda ku xad-gudubta faqrada (1) aad ee qodobkan ama ku guul-darraysata in ay dhaqan-geliso shuruudaha iyo xaaladaha ku xusan faqrada (2) aad ee qodobkan, haddii

ay ku caddaato waa dembiile, waxaana lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn Shan milyan **(5'000'000)** oo ah SL/Sh ama xadhig aan ka badnayn lix bilood ama labadaba.

## XUBINTA 2AAD

## GUDDIGA IMTIXAANAADKA QARANKA

### Qodobka 53aad
### Aasaasidda Guddiga Imtixaanaadka Qaranka

Waxa xeerkan lagu dhisayaa Guddiga Imtixaanaafka Qaranka oo leh shakhsiyad qaanuuniya iyo madaxbannaani maamul iyo maaliyadeed, waxaana la xisaabtamaya Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare

### Qodobka 54aad
### Qaab-dhismeedka Guddiga

1. Guddiga Qaran ee Imtixaanaadku waxa ay ka koobantahay
   a. Guddiga Qaranka iyo
   b. Xafiiska Agaasinka Fulinta
2. Guddigu waxa uu ka koobnaanayaa saddex iyo toban xubnood oo ay ku jiraan guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisu, waxaana soo magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Waxbrashada iyo Tacliinta Sare.
   a. Agaasimaha Guud ee Wasaarada Waxbarashada oo Guddoomiyaha ah iyo Gudoomiye ku-xigeen
   b. saddex xubnood (Jaamacadaha dalka)
   c. Hal xubin (Aqoonyahanno madax-bannaan) oo wareegto ah.
   d. Hal xubin (Dugsiyada gaarka ah)
   e. gaasimaha Waaxda Manaahijta
   f. Kormeeraha Guud ee Wasaaradda
   g. Agaasimaha Waaxda Waxbarashada Dadban
   h. Agaasimaha Waaxda Dugsiyada Sare
   i. Agaasimaha Waaxda Dugsiyada Aasaasiga ah (Hoose/Dhexe)
   j. Agaasimaha Maamulka iyo Maaliyadda
3. Muddada xilku waa Sadex Sannadood oo mar la cusboonay-siin karo.

### Qodobka 55aad
### Xuquuqda iyo xil ka-qaadista Xubnaha Guddiga

1. Mushaharka, gunnooyinka iyo xuquuqda kale ee maaliyadeed ee Guddoomiyaha, Ku-Xigeenka iyo xubnaha guddiga waxaa lagu cadaynayaa Xeer hoosaad uu yeelan doono guddigu, kuna soo saari doono Wasiirku wareegto gaar ah.
2. Haddii mid ka mid ah xubnaha ay/uu ka tago/tagto ama laga qaado xilka amaba geeriyi ku timaaddo, waxaa jagada bannaanaata buuxinteeda loo marayaa sidii marka hore loo magcaabay, iyada oo muddo bil gudaheed ah lagu soo buuxinayo xilkaas bannaanaaday.
3. Marka laga reebo xaaladaha xeerkani tilmaamayo oo lagu soo saarayo wareegto, ma bannaana in Xubinta guddiga laga qaado xilkeeda ka hor dhammaadka muddada Xafiiska.
4. Waxaa Xubinnimada lagu waayi karaa: -
    a. Is casilaad
    b. Muddada oo dhamaata.
    c. Haddii dantiisa iyo tan Guddigu iska hor yimaaddaan sida xeerkani dhigayo, lanna caddeeyo.
    d. Haddii uu galo dembi caddayn sugan loo helay oo ka soo horjeeda dhexdhexaadnimada guddiga.
    e. Haddii uu u gudan Kari waayo waajibaadkiisa xubinnimo dhibaato ka soo gaadhay jidh ahaan iyo/ama maskax ahaanba awgeed
    f. Haddii uu ka maqnaado fadhiyada guddiga in ka badan 3 kal fadhi oo isku xiga sabab la'aan

## Qodobka 56aad
## Hawlaha iyo Waajibaadka Guddiga

Waxa ay leeyhiin guddigu hawlaha iyo waajibaadka hoos ku qoran: -

1. In ay diyaariyaan xeer-hoosaadyada la xidhiidha Imtixaanaadka
2. In ay soo saaraan xeer-nidaamyada iyo go'aannada lagama maarmaanka u ah fulinta xilkooda iyo xeerkan.
3. In ay ilaaliyaan habsami u-socodka imtixaanaadka iyo in ay qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah si ay u xakameeyaan ciddii jebisa ama ku xad gudubta qodobada xeerkan
4. In ay kormeeraan qabashada Imtixaanaadka Qaranka
5. In ay Shahaadooyinka waxbarasho siiyaan ardayda ku guuleysta imtixaanaadka.
6. In ay qiimeeyaan, tilmaamaanna heerka ay u dhigmaan shahaadooyinka ay soo saaraan hay'ado waxbarasho oo deggen dalka gudahiisa ama dibeddiisa.
7. In ay dajiyaan nidaamka lagu ilaalinayo warbixinaha sida natiijada, shahaadooyinka iyo imtixaanaadka
8. In ay ka talo bixiyaan horumarinta Imtixaanaadka Qaranka si kor loogu qaado ujeeddooyinka Nidaamka Waxbarashada Somaliland

9. In ay daabacaan, faafiyaanna warbixinnaha la xidhiidha guddiga hawlahooda iyo waajibaadkooda.
10. In ay ku shaqeeyaan hawlaha iyo waajibaadka uu saarayo xeerkani ama xeerarka kale ee dalku.
11. In ay siiyaan talooyin, adeegyo xirfadeed iyo tababar, xukuumadda ama qof kale ama hay'ad kale oo deggen dalka gudahiisa ama dibeddiisa oo la xidhiidha imtixaanadka qaranka iyo qiimaynta.
12. In ay diyaariyaan shuruudaha, halbeegga, iyo habka loo qaadaayo imtixaanaadka qaranka iyada oo aan waxba loo dhimayn shuruudaha xeerkani jideeyey.
13. In ay ka gar-naqaan cabashooyinka ardayda, baadhista iyo dabagalka waxbarasho bixiyeyaasha, iyo in ay hubiyaan sugidda cabashooyinka, isla markaana xal u helaan khilaafka u dhexeeya goobaha waxbarasho ee la xidhiidha arrimaha imtixaanadka iyaga oo qaadaya tallabada ku habboon
14. In ay qabtaan cabashada dadweynaha ee la xidhiidha imtixaanaadka qaranka
15. In ay ansixiyaan ku talagalka Miisaaniyadda iyo xisaab xidhka ka hor intaan loo gudbin Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada
16. In ay ansixiyaan qorshaha iyo hab-raaca hawl-galka iyo qiimaynta waxqabadka xafiiska imtixaanaadka Qaranka
17. In ay qabtaan hawlaha kale ee uu u xil-saaro xeer ama Wasiirku.

## Qodobka 57aad
## Awoodaha Guddiga

1. Guddigu waxa uu awood u leeyaahy in uu sameeyo arrin kasta oo la xidhiidha shaqadiisa oo ku xusan xeerkan dhexdiisa ama sharciyada kale ee dalka ama lagama maarmaan u noqda, ahmiyadna u leh gudashada xilkiisa. Waxaa kale oo uu awood u leeyahay: -
    a. Go'aaminta lacagta fadhiisinka imtixaanadka qaranka kadib marka ay helaan ogolaanshaha Wasiirka
    b. In uu go'aamiyo in laga qaado lacag ama khidmad adeegyada uu qabanayo xafiisku, sida qaadista imtixaan oo ay leedahay Dawladdu ama qof kale ama hay'ad deggen dalka gudahiisa ama dibeddiisa kuwaas oo isticmaalaya qalabka xafiiska imtixaanaadka qaranka
    c. In uu Heshiisyo la galo dhinacyo kale ama cid kale oo takhasus u leh hawlaha imtixaanaadka, sida xeel-dheerayaal farsamo, mac'hadyo aqooneed iyo guddiyo la-talineed. Iyagoo la socodsiinaya dhammaan go'aannada ay gaadhaan Wasiirka Waxbarashada iyo Tacliinta Sare.
    d. Inay yeeshaan ama ay soo iibiyaan si waafaqsan xeerkan hanti kasta oo ay guddigu u aragto in ay lagama maarmaan u tahay fulinta waajibaadka iyo hawlaha guddiga.

e. Guddoomidda hibooyinka, deeqaha iyo taburucaadka iyada oo la raacayo qaraarrada iyo go'aannada u dhigan ee la xidhiidha arrintan loona gudbiyo Wasiirka iyada oo la dhawrayo xeerka.
f. Inay siiyaan tababarro iyo deeqo xubnaha guddiga ama shaqaalaha xafiiska imtixaanaadka iyo ciddii kale ee kaalmaysa guddiga iyagoo la kaashanaya cid kale ama iyaguba bixinaaya hadba sida ay u arkaan guddigu.

2. Xeer nidaamyada iyo xeer hoosaadyada guddigu ma noqonayaan dhaqan-gal ilaa la helo ogolaanshaha Wasiirka.

## Qodobka 58aad
## Fadhiyada Guddiga

1. Guddigu waxa uu kulmayaa saddexdii biloodba hal mar ugu yaraan, iyada oo uu Guddoomiyuhu isugu yeedhayo ama ku xigeenkiisu marka uu guddoomiyuhu maqan yahay.
2. Shirka Guddigu waxa uu ku qabsoomayaa marka ay fadhiyaan ugu yaraan sadex meelood laba xubnaha guddiga, waana in Guddoomiyaha ama guddoomiye ku xigeenku joogaa.
3. Waxaa kaloo uu yeelan karaa fadhiyo aan caadi ahayn marka ay sidaas soo jeediyaan guddoomiyuhu ama sadex meelood laba meelood xubnaha guddiga
4. Go'áanka Guddigu waxa uu ku ansaxayaa cod aqlabiyad ah, oo ah xubnaha jooga ee codeeyey. Marka ay codka xubnuhu isku tiro noqdaan waxaa codaynaya guddoomiyaha fadhiga.

## Qodobka 59aad
## Awoodaha Guddomiyaha

Awoodaha guddomiyaha guddigu waa: -

1. Guddoominta iyo qaybinta doodda shirarka
2. Isugu yeedhidda iyo wargelinta shirarka
3. Diyaarinta ajendayaasha shirarka isaga oo la kaashanaya Madaxa Fulinta
4. Dabagalka fulinta Go'aamada Guddiga
5. Saxeexa qoraaladda iyo go'aanada ku baxaya magaca guddiga
6. Matalaadda Guddiga
7. Hawl-gelinta xubnaha guddiga iyo guddi hoosaayada
8. Fulinta hawlaha kale ee xeerkan, xeer-hoosaadyada, guddiga ama Wasiirku u xilsaaraan
9. Guddomiyuhu waxa uu ku hadlaa afka guddiga
10. Guddoomiyuhu wuxuu noqon karaa madaxa xafiiska Imtixaanaadka Qaranka.

## Qodobka 60aad
## Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka

1. Guddoomiye ku-xigeenku waxa uu qabanayaa wax kasta oo uu u igmado guddoomiyuhu
2. Waxa uu xilka guddoomiye haynayaa marka uu maqan yahay guddomiyuhu iyo marka uu gudan kari waayo shaqadiisa sababo caafimaad darteed
3. Hadii ay guddomiyaha ku timaaddo xaaladaha ku xusan qodobka 55aad ee xeerkan, guddoomiye ku-xigeenka ayaa xilka haynaya inta la soo magacaabayo guddoomiye si aan bannaanaansho xil u dhicin
4. Guddoomiye ku-xigeenku wuxuu sidoo kale noqon karaa ku-xigeenka madaxa Imtixaanaadka Qaranka

## Qodobka 61aad
## Maamulka iyo Agaasinka Imtixaanaadka Qaranka

1. Imtixaanaadka Qaranku waxa ay yaalanayaan xafiis ka mas'uul ah qabashada imtixaanaadka qaranka iyo fulinta go'aannada Guddiga Imtixaanaadka Qaranka.
2. Waxa uu Wasiirku isaga oo la tashanaaya Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare, magacaabayaa madaxa xafiiska Imtixaanadka Qaranka iyo ku-xigeenkiisa oo ka mas'uul ah fulinta shaqada xafiiska.
3. Madaxa Imtixaanaadka Qaranku wuxuu guddida uga mas'uul yahay maamulka iyo maaraynta imtixaanaadka Qaranka si waafaqsan siyaasadda guddiga imtixaanaadka Qaranka iyo xeerarka dhaqan- galka ah ee Wasaaradda Waxbarashada
4. Madaxa Imtixaanaadka Qaranku waa sarkaalka ugu sarreeya ee maamulka iyo maaraynta, xidhiidhka, maaliyadda iyo shaqaalaha xafiiska imtixaanaadka Qaranka
5. Madaxa Imtixaanaadka Qaranku waxa uu mas'uul ka yahay
    a. Qabashada iyo isku-dubaridka Imtixaanaadka Qaranka
    b. Hawlaha maamul, maaliyadeed iyo miisaaniyadeed ee xafiiska
    c. Inuu fuliyo awaamiirta iyo go'aamada ka soo baxa guddiga
    d. Soo jeedinta shaqaalaysiinta iyada oo uu ansixinayo guddigu
    e. Kormeerka shaqaalaha iyo qiimayntooda
    f. Dayactirka xayndaabka xafiiska, agabka iyo dhukumentiga guddiga
    g. Iskuduwidda hawlaha xafiiska iyo dabagalka hawl-gallada guddi-hoosaadyada
    h. Diyaarinta iyo soo jeedinta xeer hoosaadyada
    i. Diyaarinta iyo soo jeedinta Miisaaniyadda
    j. Iyo hawlaha kale ee uu u xilsaaro xeer kale, guddigu ama wasiirku
6. Haddii uu Madaxa Imtixaanaadka Qaranku maqan yahay ama uu xanuusanaayo ama asbaabo kale awgood aanu u gudan karrin shaqadiisa, waxa ku-sime ka noqonaaya oo hawsha sii wadaaya ku-xigeenkiisa.

## Qodobka 62aad
## Shaqaalaynta Shaqaalaha iyo xuquuqdooda

Xafiisku waxa uu yeelanayaa shaqaale ka hawlgala fullinta, kuwaas oo magacaabiddooda, xil ka-qaadistooda, gunnooyinkooda, mushaharkooda, xuquuqdooda iyo waajibaadkooda lagu maamuli doono xeer hoosaadyo uu Wasiirku soo saaro si waafaqsan xeerka shaqaalaha dawladda.

## Qodobka 63aad
## Xisaabaadka

Wasiirku waxa uu bilowga sannad maaliyadeed kasta magacaabayaa hanti dhowr madax- bannaan oo hubiya qaab xisaabeedka iyo lambarka xisaabta ee Xafiiska Imtixaanaadka Qaranka, waxa kale oo uu adeegsan karaa hanti dhawrka guud ee dalka.

# QAYBTA SHANAAD

# MAAMULKA IYO MAARAYNTA TACLIINTA

## Qodobka 64aad
## Maamulka Waxbarashada.

Wasaaradda ayaa awood u leh kormeeridda dhammaan heerarka iyo noocyada kala duwan ee waxbarashada, imtixaanaadka, dejinta siyaasadaha, qorshayaasha, halbeegyada waxbarashada, isku-dubba-ridka ilaha waxbarashada iyo sidoo kale dabo-galka iyo qiimaynta nidaamka waxbarashada

# XUBINTA 1AAD

# SARAAKIISHA WAXBARASHADA

## Qodobka 65aad
## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Waxbarashada Iyo Tacliinta Sare

1. Madaxweynuhu waxa uu magacaabayaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare
2. Agaasimuhu waxa uu leeyahay xilka iyo awoodaha xeerkan iyo xeerarka kale ay jideeyeen, waxuuna uu Wasiirka kala talinayaa arrimaha waxbarashada.
3. Waxa uu mas'uul ka yahay maamulka, isku dibba-ridka iyo maaraynta hawlaha Wasaaradda
4. Waxa uu sidoo kale mas'uul ka yahay diyaarinta siyaasadaha waxbarashada, qorshayaasha horumarineed iyo fulintooda, si waafaqsan nidaamka waxbarashada
5. Xilka iyo waajibaadka Agaasimaha Guud waxa lagu qeexayaa xeer

## Qodobka 66aad
## Isuduwaha/Guddoomiyaha Waxbarashada Gobolka

Waxaa uu Wasiirku magacaabayaa Isuduwaha/Guddoomiyaha Waxbrashada Gobolka, isuduwaha/Guddoomiyaha waxbarshada ee heer gobol waxa uu u xil-saaran yahay maamulka waxbarshada ee gobolka si waafaqsan xeerka

## Qodobka 67aad
## Madaxa/Guddoomiyaha Waxbarasada ee heer Degmo

Waxaa uu Wasiirku magacaabayaa Madaxa Waxbrashada Degmada oo u xil-saaran maamulka Waxbarshada Degmada si waafaqsan xeerka**.**

## Qodobka 68aad
## Kormeeraha Guud iyo kormeerayaasha kale.

1. Wasiirku waxa uu magacaabayaa kormeeraha Guud ee Dugsiyada.
2. Waxa kale oo uu magacaabayaa kormeerayaasha kale ee Dugsiyada ee uu lagama maarmaanka u arko si loo fuliyo xeerkan
3. Kormeerayaasha loo magacaabo si waafaqsan faqrada 2aad waxa ay raacayaan tilmaamaha kormeeraha guud oo ay ka hoos shaqaynayaan.

## Qodobka 69aad
## Saraakiisha kale ee Wasaaradda

Wasaaraddu waxa kale oo ay yeelanaysaa saraakiisha kale ee lagama maarmaanka u ah fulinta hawlaheeda.

# XUBINTA 2AAD

# GUDDIGA WAXBARASHADA QARANKA

## Qodobka 70aad
## Aasaasidda Guddiga Waxbarashada Qaranka

Xeerkan waxa lagu aasaasay Guddiga Waxbarashada Qaranka oo leh shakhsiyad qanuuni ah, waxaana la xisaabtankooda leh Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare.

## Qodobka 71aad
## Qaab-Dhismeedka Guddiga

1. Guddida waxbarashadu Qaranku waxa ay ka koobantahay
    a. Guddi Qaran
    b. Guddoomye iyo
    c. Ku-Xigeen

2. Guddiga Waxbarashada Qaranku waxa ay ka koobnaanaysaa sagaal xubnood oo uu soo magacaabo Wasiirka Wasaaradda Waxbrashada iyo Tacliinta Sare isagoo la tashanaaya Agaasimaha Guud ee Wasaaradda
3. Xubnaha Guddiga waxaa xilka ka qaadi karra Wasiirka.
4. Muddada xilku waa saddex sannadood oo hal mar la cusboonaysiin karo.

## Qodobka 72aad
## Shuruudaha Xubnaha Guddiga

Waxaa xubin ka noqon karra guddiga qofka buuxiya shuruudahan:

1. Waa in uu yahay muwaadin reer Soomaaliland ah.
2. Waa in uu yahay Muslim, asluub wanaagsanna ku dhex leeyahay bulshada
3. Waa in Da'diisu aanay ka yaraan **Afartan (40) sannadood.**
4. Waa in uu waxbarasho heer jaamacadeed haystaa, ama wax u dhigma.
5. Waa in uu lahaadaa waayo aragnimo **toban (10) sannadood ah**

## Qodobka 73aad
## Bannaanaanshaha Xubinnimada Guddiga

Xubinnimada Guddigu waxa ay ku bannaanaan kartaa: -

1. Xil ka-qaadista ku xusan qodobka 71aad, faqradiisa 3aad ee xeerkan.
2. Is-casilaad qoraal ah oo ay xubintu u gudbiso Wasiirka, ogaysiinna siiso xubnaha kale ee Guddiga.
3. Geeri ku timaadda.
4. Haddii xubinta ay ku caddaato dembi xadhigiisu gaadhayo muddo saddex (3) sano ah ama ka badan.
5. Haddii xubintu u gudan karri weydo xilkeeda sababo caafimaad darro awgeed oo ay caddeeyaan guddi dhakhaatiir ah oo ka diiwaan-gashan wasaaradda caafimaadka.
6. Haddii ay xubintu ka maqnaato sadex kulan oo xidhiidha ah sabab la'aan.

## Qodobka 74aad
## Xilka Guddiga

Xilka iyo waajibaadka guddigu waa: -

1. La talinta Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda iyo dhammaan qaybaha kala duwan ee Wasaaradda
2. In ay dib u eegis ku samayso Xeerarka ay diyaariso Wasaaradu ee waafaqsan xeerkan ee u baahan ansixinta golaha wasiirada iyo baarlamanka.
3. Ka talo bixinta arrimaha waxbarashada, gaar ahaan arrimaha siyaasadda, xeer-hoosaadyada iyo istraatiijiyadda lagu horumarinayo nidaamka waxbarashada
4. La shaqaynta guddiyada kala ee Wasaaradda
5. Soo jeedinta barnaamijyada lagu horumarinayo waxbarashada

6. Diyaarinta warbixin sannadeed ku saabsan arrimaha waxbarashada, iyo
7. Wixii kale ee hawlo ah ee ku xusan xeerarka kale ama Wasiirku u xilsaaro.

### Qodobka 75aad
### Xeer-hoosaadka Guddiga

Fadhiyada guddiga, gunnooyinka xubnaha guddiga, awoodaha guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa iyo faahfaahinta xubintan waxaa lagu cadaynayaa Xeer-hoosaad uu yeelan doono guddigu, Wasiirkuna wareegto gaar ah ku soo saari doono

### Qodobka 76aad
### Guddiga Waxbarasho ee heer Gobol iyo Degmo

1. Wasiirku waa inuu dhisaa Guddiyo Waalidiin waxbarasho oo ah heer Gobol iyo Degmo kuwaasi oo Wasaaradda kala taliya arrimaha waxbarashada ee heer Gobol iyo Degmo
2. Guddiyada heer Gobal iyo heer Dagmo waxa ay hoos imanayaan oo ay la shaqaynayaan guddiga Waxbarashada Qaranka iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda
3. Wasiirku waa in uu qeexaa tirada xubnaha Guddiga, shuruudaha xubinnimada, xilka iyo waajibaadka guddiga iyo wixii kale ee lagama maarmaan u noqda xil-gudashadooda.

## XUBINTA 3AAD

## MAAMULKA WAXBARASHADA EE DAWLADAHA HOOSE

### Qodobka 77aad
### Mas'uuliyadda Waxbarashada ee Dawladaha Hoose

Dhismaha, qalabaynta, dayac-tirka iyo maamulka waxbarashada aasaasiga ah waxa ka mas'uul ah Dawladaha hoose ee degmooyinka.

### Qodobka 78aad
### Maamulidda Waxbarashada Aasaasiga ah ee Dawladaha hoose

1. Waxbarashada aasaasiga ah ee dawladda waxa maamulaya Dawladaha hoose marka ay diyaar u noqdaan, Wasiirkuna soo saaro xeerarka ku haboon.
2. Wasaaraddu waa in ay dejisaa shuruudaha iyo hab-raaca/qaabka loo qiimaynaayo diyaar-noqoshada Dawladaha hoose ee maamulidda waxbarasha aasaasiga ah.
3. Wasiirku waa ka wareejin karaa Dawladda hoose maamulka waxbarashada aasaasiga ah haddii ay jiraan sababo maangal ah.

# QAYBTA LIXAAD

# WAXBARASHADA GAARKA AH

## XUBINTA 1AAD

## GOOBAHA WAXBARASHADA GAARKA AH

### Qodobka 79aad
### Goobaha Waxbarashada Gaarka ah

1. Qof kastaa waxa uu abuuri karaa, wadina karaa goob waxbarasho oo gaar ah oo kharashkiisa uu isagu isku qabo/tashado si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka kale ee dhaqan-gal ah.
2. Goobaha waxbarasho ee gaarka ahi waxa ay bixin karaan dhammaan heerarka iyo noocyada kala duwan ee waxbarasho ee ku cad xeerka, waxaana waajib ku ah Wasaaradda in ay dejiso siyaasad iyo nidaam/hab-dhaqan cad oo ay ku qeexayso waxbarashada gaarka ah
3. Wasaaraddu waxa ay la geli kartaa heshiis mulkiilaha goob waxbarasho oo gaar ah si looga dhigo goobtaa gaarka ah goob waxbarasho oo Dawladeed, waana in isbeddelkaa lagu baahiyaa faafinta rasmiga ah.
4. Wasaaraddu waxa ay heshiis shuraako la geli kartaa dhinac leh goob waxbarasho oo gaar ah haddii ay shuraakadaasi wax ka tarayso in la gaadho bar-tlmaameedka ku xusan qodobka 5aad ee xeerkan, waana in faafaahinta heshiiskaa lagu soo saaraa faafinta rasmiga ah.
5. Iyada oo aan wax loo dhimayn faqrada 1aad, goob kasta oo waxbarasho oo gaar loo leeyahay waa in ay u hogaansantaa xeerkan iyo xeer hoosaadyada kale ee ka farcamaaya ee loogu tala-galay goobaha waxbaasho.

### Qodobka 80aad
### Madax-bannaanida Waxbarashada Gaarka ah

1. Goobaha waxbarasho ee gaarka ahi waxa ay leeyihiin madax-bannaani, Wasaaradduna waxa ay mas'uul ka tahay la socodka, kormeerka iyo qiimaynta tayada iyo heerarka waxbarasho ee goobahaas.
2. Nidaamka qiimaynta tayada goobaha waxbarasho ee gaarka ahi waxa uu la mid yahay ka Dugsiyada Dawladda.

**<u>Qodobka 81aad</u>**
**<u>Guddiyada Dugsiyada</u>**

1. Dugsiyada gaarka ah ee ku xusan qodobka 79aad waxa ay leeyihiin shakhsiyad qaanuuni ah, waxa aanay samaysan karaan guddiyo ka kooban maamulka dugsiga, waalidka, ururrada bulshada, barayaasha iyo aqoonyahanka
2. Waxaa sidoo kale guddiyo samaysan kara dugsiyada Dawladda
3. Waxay Gudiddu Ka dhigtay Sidan Tirada xubnaha guddiga, shuruudaha xubinnimada, xilka iyo waajibaadka, habka magacaabidda iyo xil ka-qaadista, muddada xilka iyo fadhiyada, waxa ay ku soo bixi doonaan xeer nidaamiya Guddiyadu Samaystan Gudoomiyaha Waxbarashaduna Ansixiyo.

**<u>Qodobka 82aad</u>**
**<u>Taageeridda Goobaha Waxbarasho ee Gaarka ah</u>**

1. Dawladdu waa in ay siisaa goobaha waxbarasho ee gaarka ah taageero iyo wixii kale ee kaalmo ah ee ay awooddo hadba sida ay ku habboon tahay
2. Wasaaraddu waa in ay dhiirri-gelisaa goobaha waxbarasho ee gaarka ah si ay u gaadhaan heerka waxbarasho ee laga rabo, una noqdaan kuwa isku filan.

## XUBINTA 2AAD

## DIIWAAN-GELINTA GOOBAHA WAXBARASHADA GAARKA AH

**<u>Qodobka 83aad</u>**
**<u>Diiwaan-Gelinta Goobaha Waxbarasho ee Gaarka ah</u>**

1. Iyada oo aan wax loo dhimayn qodobbada kale ee xeerkan, goob kasta oo gaar loo leeyahay waa in ay isu diiwaan-geliyaa si waafaqsan xeerka
2. Codsiga diiwaan-gelinta waa in loo gudbiyo xafiiksa u xil-saaran diiwaan-gelinta Dugsiyada Gaarka ah ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare iyadoo la raacaayo habka uu dhigaaya xeer nidaamiyaha Wasiirku
3. Xafiiska u xil-saaran diiwaan-gelinta dugsiyada gaarka ahi marka uu helo codsi diiwaan-gelineed oo loo sameeyey si waafaqsan sharciga, waxa uu bilaabayaa baadhis iyo qiimayn la xidhiidha shuruudaha diiwaan-gelinta.

**<u>Qodobka 84aad</u>**
**<u>Abuuridda Diiwaanka Goobaha Waxbarasho ee Gaarka ah</u>**

Xafiiska u xil-saaran diiwaan-gelinta dugsiyada gaarka ahi waa in uu u sameeyaa diiwaanka goobaha waxbarasho ee gaarka ah qaabka iyo siyaabaha uu xeerku jideeyey.

## Qodobka 85aad
## Shuruudaha Diiwaan-Gelinta

1. Xafiiska u xil-saaran diiwaan-gelinta dugsiyada gaarka ahi waxa uu diiwaan-gelin karaa goob waxbarasho oo gaar ah, marka uu codsaduhu fuliyo shuruudaha hoos ku qoran:
    a. Waa in uu keenaa manhaj waafaqasan qodobbada 45aad iyo 47aad ee xeerkan
    b. Waa in uu buuxiyaa shuruudaha xulashada Baraha ee qodobka 92aad ee xeerkan
    c. Waa in uu fuliyaa ujeeddooyinka waxbarashada qaranka ee ku cad qodobka 5aad ee xeerkan
    d. Waa in uu haystaa goob waxbarasho oo ku habboon
    e. Waa in uu keenaa caddayn awood hantiyeed ah oo ku filan fulitaanka howlaha goobta
    f. Waa in uu haystaa magac la ogol yahay oo waafaqsan sharciga.

## Qodobka 86aad
## Diiwaan-Gelinta Dhammaystiran

1. Xafiiska u xilsaaran diiwaan gelinta dugsiyada gaarka ahi marka uu helo codsiga diiwaan-gelinta oo waafaqsan sida uu dhigaayo faqrada 2aad ee qodobka 81aad, sameeyana wixii baadhid ah ee loo baahnaa, haddii uu ku qanco in shuruudihii diiwaan- gelinta la buuxiyey, waa in uu siiyaa guddoomiyaha guddiga ama qofka ka mas'uulka ah maamulka goobta waxbarasho ruqsad diiwaan-gelineed oo dhammaystiran
2. Guddoomiyaha goob waxbarasho ama qofka ka mas'uul ah maamulka goob waxbarasho waa in uu nuqulka ruqsadda diiwaan-gelinta ee waafaqsan faqrada 1aad ku dhejiyaa meel la arki karo oo ku taalla goobta waxbarasho.

## Qodobka 87aad
## Go'aanka Diidmada Diiwaan-Gelinta Goob Waxbarasho

1. Haddii xafiiska u xil-saaran diiwaan-gelinta dugsiyada gaarka ahi diido diiwaan gelinta goob waxbarasho si waafaqsan qodobka 83aad waa in la siiyaa codsadaha ogeysiis qoraal ah oo ay ku cad yihiin asbaababaha loogu diiday.

2. Codsadaha ay dhibi ka soo gaadho go'aanka diidmada ah, waxa uu kow iyo labaatan cisho gudahood oo ka bilaabanta marka uu ogeysiisku soo gaadho, uga racfaan qaadanayaa Agaasimaha Guud si waafaqsan qodobka 133aad ee xeerkan.

## Qodobka 88aad
## Beddelidda Cinwaanka Goob Waxbarasho oo Gaar ah

1. Ma bannaana in goob waxbarasho oo gaar loo leeyahay ay beddesho cinwaanka goobta ama rugta ay deggen tahay haddii aanay oggolaansho ka helin Xafiiska u xil-saaran diiwaan-gelinta dugsiyada gaarka ah.
2. Codsiga cinwaan beddelidda ama rug beddelidda waa in loo gudbiyaa xafiiska u xil-saaran diiwaan-gelinta dugsiyada gaarka ah si waafaqsan qaabka iyo siyaabaha la jideeyey.

## Qodobka 89aad
## Reebanaanta Xayeysiisyada Goobaha aan Is-diiwaan Gelin

1. Qofna uma bannaana in uu ku muujiyo goob waxbarasho xayeysiis, warbixin qoraal ah ama wixii kale ee la mid ah, haddii aanu haysan diiwaan-gelin dhammaystiran ama mid ku meel gaadh ah oo ku soo baxday si waafaqsan faqrada 1aad ee qodobka 86aad.
2. Qof kasta oo jabiya faqrada 1aad ee qodobkan waxa uu galayaa fal- dambiyeed, haddii uu ku cadaado ay ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn Laba milyan (2’000’000) oo shilinka Somaliland ah.

## Qodobka 90aad
## Laalidda Ruqsadda Diiwaan-Gelinta

1. Si waafaqsan xeerkan, Xafiiska u xil-saaran diiwaan gelinta dugsiyada gaarka ahi waxa uu laali karaa ruqsadda diiwaan-gelinta goob waxbarasho oo gaar ah, haddii uu ku qanco in ay jiraan arrimahan hoos ku qoran:
    a. Goobta oo ah mid aan buuxin shuruudaha ku xusan qodobka 85aad ee xeerkan
    b. Diiwaan gelinta goobta oo ah mid lagu helay si baal-marsan sharciga
    c. Maamulka goobta oo ah mid faafinaya dhaqamo iyo caadooyin ka soo horjeeda Shareecada Islaamka iyo dhaqanka suubban ee reer Somaliland
    d. Goobta oo aanay waxbarasho ka socon muddo sannad ah
2. Ma noqonayso laalidda ruqsadda diiwaan gelinta goob waxbarasho oo gaar ah mid dhaqan gal: -
    a. Haddii aan mulkiilaha leh ama Wakiilkiisa goobta waxbarasho la siin ogeysiis ka yimid xafiiska u xil-saaran diiwaan gelinta dugsiyada gaarka ah oo ay ku cad yihiin asbaababa ruqsad laalidda
    b. Haddii aan mulkiilaha leh Goobta waxbarasho la siin fursad uu isku difaaco intaan la go’aamin laalidda ruqsadda diiwaan gelinta
    c. Haddii aan mulkiilaha leh goobta waxbarasho la siin rafcaan qaadashada ku cad qodobka 133aad

3. Haddii aanay jirin arrimaha ku xusan faqrada 2aad ee qodabkan, Xafiiska u xil-saaran diiwaan-gelinta dugsiyada gaarka ahi waxa uu laalayaa ruqsadda diiwaan gelinta ee goobta waxbarasho, waxaana ku waajib ah guddoomiyaha guddiga ama maamulka goobta waxbarasho ee gaarka ah in ay kow iyo labaatan cisho gudahood ku wareejiyaan ruqsadda diiwaan-gelinta iyo wixii kale ee agab ah ee ay leedahay Dawladdu.
4. Go'aanka ruqsad laalidda waa in lagu baahiyaa faafinta rasmiga ah
5. Si waafaqsan qodobkan, Wasiirku waa in uu jideeyaa hab caddaalad ku salaysan oo loo raaco raqsad laalidda.

## Qodobka 91aad
## Dembiyada la xidhiidha Diiwaan-Gelinta Goobaha Waxbarasho ee Gaarka ah

Qof kasta oo ah guddoomiye guddi ama mas'uul ka ah maamulka goob waxbarasho oo gaar ah oo ku hela diiwaanka goobta sifo baal-marsan sharciga ama ka noqda guddoomiye ama maamule goob waxbarasho oo aan diiwaan gashanayn si waafaqsan xeerka, waxa uu galayaa fal- dambiyeed, haddii uu ku cadaado ay ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn Saddex milyan (3'000'000) oo shilinka Somaliland ah.

# QAYBTA TODOBAAD

# BARE, URURKA MACALIMIINTA IYO MAAMULAYAASHA DUGSIYADA

## *XUBINTA 1AAD*

## BARRE

## Qodobka 92aad
## Shuruudaha Bare Qaadashada

Qof kasta oo raba in uu bare ka noqdo goob waxbarasho oo diiwaan gashan waa in uu buuxiyaa shuruudaha hoos ku qoran

1. Baraha Dugsiga Sare waa in uu haystaa shahaado Jaamacadeed, una tababaran yahay macalinimo
2. Baraha Dugsiga Hoose/Dhexe waa in uu haystaa shahaado dugsi sare, una tababaran yahay macalinnimo
3. Baraha Dugsiga Xanaanadda carruurta waa in uu haystaa shahaado dugsi hoose-dhexe, una tababaran yahay macalinnimo
4. Imtixaanka qiimaynta Wasaaradda waa in uu ku baasaa ugu yaraan darajada **c** ama boqolkiiba lixdan
5. Waa in uu leeyahay akhlaaq fiican iyo dhaqan suubban

6. Waa in aanu hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo kama- dambays ah oo maxkamad horteed kaga caddaaday shantii sano ee ugu dambeeyey
7. Waa in uu ka fayow yahay maskax ahaan iyo jidh ahaanba, iin culus oo wax u dhimi karta gudashada xilkiisa
8. Waa in aanay da'diisu ka yarayn 18 jir
9. Waa in uu u diiwaan- gashan yahay bare ahaan si waafaqsan qodobka 94aad

## Qodobka 93aad
## Xilka Baraha

Xilka Baruhu waa:

a. Waxbaridda iyo barbaarinta ardayda
b. Fulinta Manhajka dugsiga
c. Qiimaynta waxbarashada ardayga
d. Ka kaalmaynta maamulaha xagga maamulka dugsiga
e. Ka warbixinta manhajka waxbarashada
f. Ka qayb-galka laylisyada iyo waxqabadyada dugsiga iyo ilaalinta nabadgelyada ardayga fasalka dhexdiisa, iyo
g. Wixii kale ee ku cad xeerarka iyo xeer-hoosaadyada Wasaaradda

## Qodobka 94aad
## Diiwaanka Barayaasha

1. Xafiiska u xil-saaran barayaashu waa in uu abuuraa diiwaanka Barayaasha kaas oo ay tahay in la geliyo dhammaan macluumaadka Barayaasha si waafaqsan xeerka.
2. Habka loo samaynaayo diiwaan-gelinta baraha waxa lagu qeexi doonaa xeer Wasiir.

## Qodobka 95aad
## Diiwaan-Gelinta Barayaasha

Xafiiska u xil-saaran barayaashu kadib marka uu helo codsi diiwaan-gelineed oo si sharci ah loo sameeyey, uuna sameeyo wixii baadhid ah ee loo baahan yahay, waa in uu diiwaan-geliyaa bare kasta oo buuxiya shuruudaha ku xusan qodobka 92aad ee xeerkan, waxaanu u soo saarayaa ruqsad macalinimo si waafaqsan sharciga

## Qodobka 96aad
## Kala Noqoshada Diiwaan-Gelinta

1. Haddii xafiiska u xilsaaran barayaashu uu ku qanco
    a. In diiwaan gelinta baraha lagu helay si sharciga baalmarsan ama
    b. Aanu Baruhu buuxin shuruudaha qaadashada Baraha ee ku xusan qodobka 92aad ee xeerkan ama
    c. Aanu haysan aqoonsi uu wax ku dhigi karo ama aqoonsiga uu haystaa uu yahay mid aan ku filnayn ama
    d. Aanu si joogta ah wax uga dhigin dugisiga

2. Waxa uu xafiisku u dirayaa qofkaasi si waafaqsan shuruucda kale ee dhaqan galka ah ogeysiis uu ku wargelinaayo in lagala noqday ruqsaddii
3. Baraha ay dhibi ka soo gaadhay ogeysiiska ku xusan faqrada koowaad waxa uu racfaan u qaadanayaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, kow iyo labaatan cisho gudahood oo ka bilaabanta maalinta ogeysiiska la soo gaadhsiiyey si waafaqsan qodobka 133aad ee xeerkan.
4. Haddii racfaanka aan lagu qaadan muddada ku xaddidan faqrada labaad ama racfaanku uu yahay mid la diiday, xafiiska u xil-saaran barayaashu waxa uu la noqonayaa ruqsadda diiwaan-gelinta Baraha, waxaanu u dirayaa ogeysiis uu arrintaa ku wargelinaayo.

## Qodobka 97aad
## Wargelinta Wax-dhigidda Baraha

Bare kasta oo diiwaan gashan waa in afar iyo toban cisho gudahood oo ka bilaabma marka uu shaqada bilaabay ama marka uu ka tagay ku wargaliyaa xafiiska u xil-saaran barayaasha, qoraal ahaan magaca goobta waxbarasho ee uu wax ka dhigo ama uu ka tagay iyo waqtiga uu bilaabay wax-dhigidda ama uu ka tagay.

## Qodobka 98aad
## Horumarinta Barayaasha iyo Shaqaalaha Waxbarashada

1. Qofna ma furan karo, mana samaysan karo kulliyadda macallimiiinta/ barenimo, haddii aanu fasax ka haysan Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare
2. Iyadoo aan wax loo dhimayn faqradda 1aad, Wasaaraddu waxay furi kartaa Kulliyadaha barayaasha oo ay ku bixinayso Tababarrada barayaasha
3. Wasaaraddu waa in ay horumarisaa tayada barayaasha iyo shaqaalaha Wasaaradda si loo helo barayaal iyo shaqaale waxbarasho oo xirfad leh
4. Wasaaraddu waa inay qaadataa kaalin kormeer iyo isu-duwid ah si goobaha ka mas'uulka ah soo saarista iyo horumarinta Barayaasha iyo shaqaalaha waxbarasho ay u noqdaan kuwo u diyaarsan, awoodna u leh inay diyaariyaan shaqaale cusub, isla markaana si joogto ah ay u horumariyaan shaqaalaha iyaga oo shaqadooda wata.

## Qodobka 99aad
## Dembiyada La xidhiidha Barayaasha

Bare kasta oo wax ka dhiga dugsi Dawladeed oo gudan waaya xilkiisa ama jabiya heshiis macallinomo oo uu la galay Wasaaradda ama si khaldan u qaata lacagta mushaharka ama ku xadgudba xeerkan waxa uu galay fal-dembiyeed, haddii uu ku caddaado ay ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn saddex milyan (3, 000,000) oo shilinka Somaliland ah.

# XUBINTA 2AAD

# URURKA MACALIMIINTA IYO MAAMULAYAASHA DUGSIYADA

## Qodobka 100aad
## Ururka Macalimiinta Qaranka

Xeerkan waxa lagu aasaasayaa Uruurka Macalliminta Qaranka oo ah gole madax-banaan, waxaana la xisaabtankiisa leh Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare, waxaanu yeelanayaa xeer u gaar ah.

## Qodobka 101aad
## Maamule Dugsi

Dugsi kasta oo leh ugu yaraan 4 fasal waa in loo magacaabaa maamule

## Qodobka 102aad
## Shuruudaha Magacaabidda Maamule Dugsi

Waxaa Maamule dugse loo magacaabi karaa qof:

1. Buuxiyey shuruudaha Barenimo ee ku xusan qodobka 92aad ee xeerkan
2. Leh khibrad Barenimo oo aan ka yarayn 3 sano
3. Ka fayow maskax ahaan iyo jidh ahaanba iin culus oo wax u dhimi karta gudashada xilkiisa.

## Qodobka 103aad
## Xilka Maamule Dugsi

Xilka maamule dugsi waa

1. fulinta barnaamijka waxbarashada
2. Ilaalinta hantida Dugsiga
3. Go'aaminta qiimaynta waxbarashada ardayda
4. Habaynta iyo xafididda dhukumentyada dugsiga
5. Fulinta xeerarka iyo xeer-hoosaadyada maamula waxbarashada
6. Hoggaaminta xidhiidhka dugsiga iyo bahda waxbarashada
7. Ilaalinta nabadgelyada iyo nadaafadda dusiga
8. Xidhiidhinta dugsiga iyo Wasaaradda Waxbarashada
9. Ka taakulaynta Baraha gudashada xilkiisa
10. Horumarinta waxqabadyada dugsiga
11. Dabagalka iyo qiimaynta tayada waxbaridda dugsiga
12. Sugidda edebta iyo anshaxa shaqaalaha iyo ardayda
13. Hoggaaminta iyo kormeerka shaqada dhammaan shaqaalaha dugsiga
14. Nidaaminta iyo ka qaybgalka qiimaynta Barayaasha
15. Iyo wixii kale ee xeer kale ama Wasiirku jideeyo.

**Qodobka 104aad**
**Maamule Ku-Xigeen Dugsi**

1. Dugsi kasta oo ah hoose-dhexe oo ka kooban ugu yaraan 8 fasal ama ah dugsi sare oo ka kooban ugu yaraan 4 fasal waxa uu yeelan karaa maamule ku-xigeen iyo xoghaye
2. Maamule ku-xigeen dugse waxa uu u xil-saaran yahay hawlaha uu u igmado maamuluhu iyo inuu ku sime ka noqdo hawsha dugsiga markuu Maamuluhu maqan yahay.

**Qodobka 105aad**
**Maamulka Shaqaalaha Waxbarashada**

1. Wasaaraddu waxa ay yeelanaysaa xafiis u xilsaaran shaqaalaha Wasaaradda oo ka mas'uul ah maamulidda arrimaha shaqaalaha Wasaaradda.
2. Barayaasha iyo shaqaalaha waxbarashada waxa lagu maamulayaa xeerka shaqaalaha Dawladda.

# QAYBTA SIDEEDAAD

# KORMEERKA GUUD EE DUGSIYADA IYO TAYO-DHAWRKA WAXBARASHADA

## XUBINTA 1AAD

## KORMEERKA GUUD EE DUGSIYADA

**Qodobka 106aad**
**Kormeerka Guud.**

1. Kormeerka guud waxa u xilsaaran yahay kormeerka, la-socodka iyo qiimaynta nidaamka waxbarashada dugsiyada, waxa uu la taliyaa xafiiska manaahijta, xafiiska imtixaanaadka qaranka, saraakiisha waxbarashada gobollada, maamulayaasha dusiyada iyo guddiyada kale ee waxbarashada.
2. Kormeerka Dugsiyadu waa in uu ahaadaa mid joogto ah oo loo fuliyo si waafaqsan xeer nidaamiyaha u dejisan kormeerka dugsiyada.

**Qodobka 107aad**
**Kormeeraha Guud**

1. Kormeeraha guud waxa uu mas'uul ka yahay
    a. Kormeeridda iyo la socodka nidaamka waxbarashada dugsiyada
    b. Hubinta dabbaqaadda siyaasadaha, halbeegyada iyo manaahijta waxbarasho isagoo kaashanaaya kormeerayaasha xarunta
    c. Kormeeridda goobaha waxbarasho si waafaqsan xeerka

    d. Fulinta wixii kale ee waajib ah ee uu faro Wasiirku ama Agaasimaha Guud ee la xidhiidha kormeerka goobaha waxbarasho ama u jideeyay sharcigu.
2. Shaqaalaha kormeerka guud waxa ay la shaqaynyaan kormeeraha guud si waafaqsan sharciga.

## Qodobka 108aad
## La talinta Kormeerka ee Goobaha Waxbarasho

Kormeeraha Guud ama shaqaalaha kormeerka guud waxa uu talo ka siin karaa maamulaha/guddoomiyaha dugsiga ama qof kasta oo mas'uul ka ah maamulka goob waxbarasho iyo barayaasha arrimaha la xidhiidha waxbarashada iyo barbaarinta.

## Qodobka 109aad
## Xaddidaadda Amarrada kormeerayaasha

Kormeeraha Guud ama kormeerka guud haddii aanu awood ka haysan xeer-nidaamiye ku dhisan xeerkan waa in aanu soo saarin amar ama tilmaan ku socota guddoomiyaha goob waxbarasho ama maamulaha goob waxbarasho.

## Qodobka 110aad
## Warbixinnada Kormeerayaasha

1. Kormeeraha guud waa in uu u gudbiyaa Agaasimaha Guud warbixinta khusaysa goob lagu sameeyey kormeer si waafaqsan qodobka 106aad ee xeerkan.
2. Warbixinta goobaha waxbarasho ee loo gudbiyo si waafaqsan faqrada 1aad waa dhukumanti sir ah, laakiin marka la helo ogolaanshaha Agaasimaha Guud waxaa loo gudbin karaa cidda ka mas'uul ah maamulka goobta waxbarasho iyo barayaasheeda, waxaana loo gudbinayaa warbixinta oo dhammaystiran.

## Qodobka 111aad
## Awoodaha Guud ee kormeerka

1. Iyadoo ay ujeeddadu tahay kormeerka goobaha waxbarasho si waafaqsan qodobka 107aad, faqradiisa 2aad, ayaa kormeeraha guud ama shaqaalaha kormeerku ay:
    a. Geli karaan goob waxbarasho waqti kasta
    b. Warbixin ka dalban karaan guddoomiyaha guddiga dugsiga ama cid kasta oo ka mas'uul ah maamulka goob waxbarasho ama bare ama shaqaale ama qof jooga goob waxbarasho
    c. Ka dalban karaan xilli kasta in uu keeno si loo baadho jedwal, manhaj ama diiwaan ay ku dhigan yihiin maaddoyinka la dhigo ama la dhigi doono ama dhukumenti la xidhiidha waxbarashada goobta

## Qodobka 112aad
## Igmashada Kormeeraha Guud

Madaxa kormeerku waxa uu qoraal ahaan u igman karaa awooddiisa sarkaal waxbarasho oo ku magacaaban si waafaqsan qodobka 68aad ee xeerkan.

## Qodobka 113aad
## Kormeerka Agaasimaha Guud

Agaasimaha Guud waa in si aan jooto ahayn u kormeeraa ama cid kormeerta u diraa goob waxbarasho oo ku diiwaan gashan si waafaqsan xeerkan si loo hubiyo in xeerkan iyo xeerarka kale ee ka farcamaa ay dhaqan-gal u yihiin.

## Qodobka 114aad
## Dembiyada la xidhiidha Kormeerka

Qof kasta oo u gudbiya saraakiisha kormeerka dugsiyada warbixin been ah ama qaldan ama si kas ah u qariya xaqiiqo dhab ah ama diida in uu soo bandhigo dhokumentiyo la xidhiidha waxbarashada ama ka hor istaaga madaxda loo igmaday kormeerka dugsiga in ay gutaan howshooda waxa uu galay fal-dembiyeed, haddii uu ku caddaado ay ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn Laba milyan (2,000,000) oo shilinka Somaliland ah.

# XUBINTA 2AAD

# TAYO-DHAWRKA WAXBARASHADA

## Qodobka 115aad
## Xaqiijinta Tayada

1. Waa in uu jiraa hab lagu gaadho tayada waxbarashada si loo xaqiijiyo tayada iyo halbeegyada waxbarasho ee heer kasta; shuruudaha iyo hannaanka lagu xaqiijinayo tayada waa in lagu sheegaa xeer-nidaamiye, siyaasado iyo habraacyo Wasiir.
2. Goobaha waxbarasho waa in ay dajiyaan hab lagu xaqiijiyo tayada xarumahooda.
3. Wasaaraddu waa in ay diyaarisaa warbixino sannadle ah oo khuseeya tayada goobaha waxbarashada iyo heerarka ay gaadheen/xaqiijiyeen.

## Qodobka 116aad
## Xafiiska Qiimaynta Halbeegyada iyo Tayada Waxbarashada Qaranka

1. Waa in la sameeyaa Xafiiska Qiimaynta Halbeegyada iyo Tayada Waxbarashada Qaran oo mas'uul ka ah dejinta shuruudaha iyo hannaanka qiimaynta waxbarashada si loo xaqiijiyo tayada goobaha waxbaarasho.

2. Goob kasta oo waxbarasho waa in la qiimeeyaa tayadeeda waxbarasho ugu yaraan sannadkii hal mar, natiijada qiimayntaa waa in loo gudbiyaa hay'adaha ay khusayso, dadkana looga dhigaa wax ay heli karaan.

## Qodobka 117aad
## Bixinta Warbixinnada

Goobaha waxbarasho waa in ay bixiyaan, diyaariyaan dhukumentiyada iyo caddaymaha la xidhiidha goobaha waxbarasho haddii uu sidaasi soo codsado Xafiiska Qiimaynta Halbeegyada iyo Tayada Waxbarashada Qaran ama ciddii kale ee u xilsaaran howshaas.

## Qodobka 118aad
## Goobaha aan buuxin Halbeegyada Tayada Waxbarasho

Hadii ay natiijada qiimayntu muujiso in goob waxbarasho aanay gaadhin heerkii looga baahnaa, Xafiiska Qiimaynta Halbeegyada iyo Tayada Waxbarashada Qaran waa in uu u gudbiyaa Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare talooyin iyo tallaabooyinka lagu saxaayo goobtaasi si waafaqsan xeerka.

# QAYBTA SAGAALAAD

# MAALIYADDA IYO MAALGELINTA WAXBARASHADA

## Qodobka 119aad
## Maalgelinta Waxbrashada

1. Waa in la abaabulaa sidii loo heli lahaa khayraad iyo maalgelin ka timaadda Dawladda, Hay'adaha Caalamiga ah, Shirkadaha, Ururrada maxalliga ah, dadweynaha iyo jaaliyadaha iyo dalalka Shisheeye, si loogu isticmaalo horumarka waxbarashada
2. Dawladdu waa in ay dhiirri-gelisaa goobaha waxbarasho iyo hay'adaha caawiya waxbarashada
3. Waxaa loo fidin karaa cashuur-dhaaf agabka waxbarasho si waafaqsan xeerka cashuurah.

## Qodobka 120aad
## Kiraynta, Isticmaalidda Hantida iyo Adeegga Goobaha Waxbarasho ee Dawladda

Goobaha waxbarasho ee Dawladda waa in awood loo siiyaa in ay maamulaan, kormeeraan, hayaan, isticmaalan, ama **ay** ka helaan kiro hantidooda aanay isticmaalayn, waa in loo awood-siiyaa, laguna maamulaa in ay ka helaan dakhli

adeegyada ay bixiyaan; oo ka qaadaan lacag-wax-dhigid oo aan ka hor-imanayn sharciga, siyaasadaha iyo ujeeddooyinka guud ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare.

## Qodobka 121aad
## Qoondaynta Miisaaniyadda Waxbarashada

Wasaaraddu waa in ay u qoondaysaa miisaniyadda waxbarashada si waafaqsan siyaasadaha iyo Qorshayaasha horumarineed ee waxbarashada

## Qodobka 122aad
## Qaybinta Deeqaha Waxbarasho

Dawladdu waa in ay u qaybisaa deeqaha iyo mucaawimada waxbarashada ee ay bixiyeen, waddamo shisheeye, hay'ado caalami ah, ururro bulsho, shirkado iyo ciddii kale si cadaalad ah oo hufan.

## Qodobka 123aad
## Xisaabaadka iyo Hanti Dhawrka

1. Sannad maaliyadeedka Wasaaraddu waxa uu la mid yahay ka xukuumadda.
2. Wasaaraddu waxa ay yeelanaysaa sannad walba miisaaniyad u gaar ah.
3. Miisaaniyadda gaarka ah ee Wasaaradda iyo sandduuqeeda xisaabta (Financial account) waxaa gudbinaaya Wasiirka Wasaaradda isaga oo ka ansixin doona hay'adaha ay khusayso.
4. Agaasimaha Guud isaga oo la tashanaya cidda ay khusayso waxa uu diyaarinayaa Miisaaniyad sannadeedka, odoroska miisaaniyad sannadeedka marka dambena waxa Wasiirka loo gudbinayaa 3 bilood ka hor dhammaadka sannad maaliyadeedka.
5. Wasiirku waxa uu bilowga sannad maaliyadeed kasta magacaabayaa hanti dhawr madax- bannaan oo hubiya qaab xisaabeedka iyo lambarka xisaabta ee Wasaaradda. Waxa kale oo uu adeegsan karaa hanti dhawrka guud ee dalka.
6. Agaasimaha Guud waxa uu diyaarinayaa warbixin xisaabeed sannadle ah isaga oo nuqul siinayaa Wasiirka
7. Nidaamka xisaabaadka iyo maamulka goobaha kaydadka waxa lagu dhaqmayaa shuruucda iyo xeerarka Qaranka
8. Wasaaraddu waxa ay yeelanaysaa xafiis u xil-saaran maamulka iyo maaliyadda.

# QAYBTA TOBANAAD

# TIKNOOLOOJIYADDA WAXBRASHADA

## Qodobka 124aad
## Qaybinta Mawjadaha iyo Aaladaha dira Seenyaalaha

Dawladdu waa in ay qaybisaa mawjadaha (frequencies), aaladaha dira seenyaalaha (signal transmission devices), iyo kaabayaasha kale ee daruuriga u ah baahinta idaacadeed (radio broadcasting), telefiishan, raadyowga isgaadhsiisneed iyo warbaahinta kale ee isgaadhsiisneed si loogu isticmaalo bixinta waxbarashada tooska ah (formal) iyo ta dadban (non-formal) iyo horumarinta arrimaha diinta iyo dhaqanka wanaagsan.

## Qodobka 125aad
## Dhiirrigelinta soo saarista iyo Daabacaada Buugaagta

Wasaaraddu waa in ay kobcisaa, isla maarkaana taageertaa soo saarista iyo habaynta buugaagta ardayda (textbooks), buugaagta tixraaca (reference books), buugaagta aqooneed (academic books), daabacadaha (publications), alaabta iyo tiknooloojiyada kale ee waxbarasho.

## Qodobka 126aad
## Kobcinta Tiknooloojiyadda Waxbarasho

1. Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare waa in ay kor u qaaddaa cilmi baadhista iyo isticmaalka tiknooloojiyadda casriga ah, waana in ay hurumarisaa aqoonta tiknoolojiyadda ee ardayda dugsiyada Dawladda hadba inta ay awoodeeddu tahay.

2. Sidoo kale waa in ay dabagal ku sameeyaan oo ay qiimeeyaan isticmaalkeeda iyagoo kaashanaya komishanka Tiknooloojiyadda Somaliland si loo yareeyo kharashka, lanna hubiyo in sida ugu habboon loogu fulinaayo hannaanka waxbarashada Somaliland.

## Qodobka 127aad
## Waaxda Qorshaynta, Siyaasadda iyo Cilmi baadhista

Wasaaraddu waa in ay yeelataa waax ka mas’uul ah qorshaynta, siyaasadda iyo cilmi baadhista iyo sidoo kale arrimaha la xidhiidha tiknooloojiyadda casriga ah.

# QAYBTA KOW IYO TOBANAAD

# QODOBBO KALA DUWAN

## Qodobka 128aad
## Waxqabadyada (Nashaadka) Ardayga

Muqararka rasmiga ah ee dugsiga waxaa lagu kaabayaa Waxqabadyada (nashaadka isboortiga, doodo cilmiyeed, aqoon iswaydaarsi, farshaxan, muxaadarooyin iyo hawlihii kale ee kobcinaya hiwaayadaha ardayga).

## Qodobka 129aad
## Anshaxa Ardayda

1. Ardayga ku xadgudba xeerka iyo nidaamka dugsiga ama ardayda kale ama Barayaasha ama shaqaalaha dugsiga ama madaxda dugsiga ama dembi ku gala dugsiga dhexdiisa ama waxyeello u geysta hantida dugsiga waxa uu mutaysanayaa ciqaab.

2. Nooca ciqaabta waxa Loo Raacaya go'aanka Gudidda Anshaxamarinta ee Dugsiga.

## Qodobka 130aad
## Diiwaan Gelinta Ardayda

Mamulaha dugsiga ama ciddii kale ee mas'uul ka ah maamulka goob waxbarasho oo gaar loo leeyahay ama mid Dawladeed waa in uu hayaa ama abuuraa diiwaan ay ku qoran yihiin dhammaan macluumaadka/xogaha ardayda ee goobta waxbarasho.

## Qodobka 131aad
## Muddada Sannad Dugsiyeedka

Muddada sanad dugsiyeedku kamma yaraan karto 35 toddobaad, kamana badnaan karto 39 toddobaad.

## Qodobka 132aad
## Dembiyada iyo Ciqaabaha aan ku xusnayn xeerkan

1. Iyadoo aan wax loo dhimayn qodobbada xeerkan iyo shuruucda kale ee dhaqan galka ah, waxaa uu Wasiirku soo saari doono xeer-nidaamyo u gaar ah dembiyada iyo ciqaabaha la xidhiidha ku xad-gudubka xeerkan.

2. Qofna laguma ciqaabi karo, xadhig ama ganaax ka badan sadex milyan oo ah shilinka Somaliland haddii aan maxkamad horteeda lagaga caddaynin, waxaana faahfaahinta qodobkan lagu qeexi doonaa xeer nidaamiyaha u gaarka ah.

## Qodobka 133aad
## Racfaanka

1. Go'aannada maamul ee Wasaaradda waxaa racfaan looga qaadanayaa kow iyo labaatan cisho gudahood oo ka bilaabma marka go'aanka la gaadhsiiyo racfaanlaha, Agaasimaha Guud, Go'aannada ka soo baxa Agaasimaha Guudna waxa racfaan looga qaadanayaa Wasiirka.
2. Agaasimaha Guud waa in uu baadhid ku sameeyaa xaqiiqda dacwadda isagoo adeegsan karra ciddii uu u arko in ay ku habboon yihiin, kadibna ka soo saaraa go'aan sababaysan.
3. Haddii go'aan uu gaadhay Agaasimaha guud rafcaan looga qaato xagga Wasiirka, waxa uu Wasiirku samaynayaa guddi baadhiseed oo uu u arko in ay ku habboon yihiiin in ay baadhid ku sameeyaan xaqiiiqada dacwadda kadibna ay u soo gudbiyaan warbixin.
4. Kadib marka uu tixgeliyo warbixinta ku soo baxday si waafaqasan faqradda (3) waxa uu Wasiirku go'aaminayaa arrinta racfaanka laga qaatay waxaanu samaynayaa amar arrintaa ku saabsan kaas oo uu u arko in uu yahay mid ku habboon oo sax ah.
5. Go'aanka Wasiirka ee racfaanku waa kama-dambays.

## Qodobka 134aad
## Awoodaha Guddida Baadhista

1. Cid kasta oo samaynaysa badhitaan sida ku cad qodobka 133aad waa in uu wargeliyaa dhinacyada ay khusayso magaacibistu, una sheegaa howl-galka shaqo ee uu ka duulayo, oo ay saxeexday cidda awoodda u lihi, Waxaana u bannaan: -
   a. In uu galo dhismaha goob kasta oo waxbarasho wakhti kasta oo macquul ah, marka uu siiyo ogeysiis wakhti ku filan qofka goobtaa waxbarsho ka mas'uulka ah
   b. In uu amro qof kasta oo haya caddaymo la xidhidha badhitaanka in uu horyimaaddo wakhti cayiman iyo goob cayiman si uu uga jawaabo su' aalo;
   c. In uu weydiiyo su'aalo qof kasta oo muhiim u ah baadhitaanka

2. Si loo helo baadhitaan sax ah waxaa reebban arrimahan hoos ku qoran
   a. In sifo sharci-darro ah la isu hortaago baadhitaanka ku xusan Qodobkan.
   b. In la iman waayo wakhtiga iyo goobta la cayimay sida ku xusan qodobkan farqada 1aad xarafka (b)

d. In la diido jawaabidda su'aalaha ku xusan qodobkan farqada 1aad xarafka (c)

d. In si kas ah looga been sheego jawaabidda su'aalaha

e. In la diido soo dhiibidda walax kasta oo amar ka soo baxay dhiibideeda

f. In la hor-joogsado qof la amray in uu hor yimaaddo guddiga.

3. Iyada oo aan wax loo dhimayn xeerarka kale ee dhaqan-galka ah qof kasta oo ku eedaysan fal-dembiyeedyada ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan, haddii lagu helo waxa uu mutaysanyaa ganaax aan ka badnayn laba milyan oo shilinka Somaliland ah.

4. Qof kasta oo lagu magacaabay si waafaqsan qodobkan oo aan ahayn shaqaale dawladeed oo joogta ah waxa la siin karaa gunno sida uu Wasiirku go'aamiyo.

## Qodobka 135aad
## Awoodda Wasiirka ee soo saarista Siyaasadaha iyo Xeer-Nidaamyada

1. Wasiirku waxa uu dejinayaa siyaasado, xeer-hoosaadyo lagu dhaqan gelinaayo xeerkan, waxaana ahmiyad gaar ah la siinayaa siyaasadaha iyo xeer hoosaadyada ku saabsan.
   a. Goobaha waxbarasho,
   b. Ardayda
   c. Barayaasha
   d. Maaliyadda iyo hantida waxbarashada
   e. Manaahijta
   f. Imtixaanaadka iyo Qiimaynta
   g. Nidaamka waxbarasho
   h. Kormeerka

## Qodobka 136aad
## Qodobada Kala-Guurka

1. Goob kasta oo waxbarasho oo Dawladeed ama gaar loo leeyahay oo loo abuuray ama ay ahayd in la abuuro si waafaqsan xeerka oo jirtay wakhti ka hor taariikhda uu dhaqan galay xeerku, waxaa loo aqoonsayaa in ay noqoto goob waxbarasho oo u diiwaan gashan si waafaqsan xeerka.

2. Bare kasta oo ka diiwaan gashan Wasaaradda waxbarashada ama goobaha gaarka loo leeyahay wakhti ka hor taariikhda uu dhaqan galay xeerku, waxaa loo aqoon sanayaa in uu yahay bare u diiwaan gashan si waafaqsan xeerka.

3. Maamul kasta oo la talin ah oo jirey in yar ka hor taariikhda dhaqan galka xeerkan waxa ay sii ahaanaysaa mid sii shaqaysa ilaa inta ay dhaqan gelayaan xeer-hoosaadyada uu soo saaro Wasiirku si waafaqsan xeerka.

## Qodobka 137aad
## Laallis

Waxaa la laalay dhammaan wareegtooyinka, xeerarka, qaab-dhaqanka, wargelinaha iyo awaamirta ka soo horjeeda xeerkan ama aan la socon Karrin.

## Qodobka 138aad
## Dhaqan galka Xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqan galayaa marka uu barlamaanku (Wakiilada iyo Guurtida) ansixiyo, Madaxwynuhuna saxeexo.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

**Md. Baashe Maxamed Faarax**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL.**